WAAXDA SHAQAALAHA EE MAINE

*Qaybta Baxnaaninta Xirfadda*

Shuraako sharaf leh oo ka tirsan shabakadda

americanjobcenter®







# BUUG-GACMEEDKA MACMIILKA

## ee Adeegyada Baxnaaninta Xirfadda

**Diseembar 2020**

VR100

BAXNAANINTA XIRFADDA • 1920-2020

*Qaybta Baxnaaninta Xirfadda*
*Xafiiska Adeegyada Baxnaaninta*

*Waxaa la sameeyay iyadoo lala kaashanayo*
*Golaha Baxnaaninta Gobolka Maine*

**Liiska Mawduucyada**

Hordhac ........ 1
Xaq ma u yeelan doonaa adeegyada DVR? ........ 2
U qalmitaanka Ardayda Kala-guurka ........ 2
Xulashada Macmiilka ee la Ogaysiiyay ........ 3
Sideen u horumariyaa qorshe wax ku ool ah oo macno leh oo Shakhsiyeed oo Shaqo? ........ 4
Waa maxay Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqada? ........ 4
Dejinta qorshe lagu gaaro yoolka ........ 5
Waxyaabaha ay DVR u baahan tahay inay eegto ka hor intaysan oggolaan IPE-gaaga ........ 6
Maxaa dhacaya haddii aan rabo inaan beddelo IPE AMA haddii aan u baahdo adeegyo dheeraad ah? ........ 6
Yaa bixinaya kharashka adeegyada aan u baahanahay? ........ 7
Marka aad gaarto yoolkaaga shaqo ........ 8
Adeegyada ay DVR bixin karto ........ 8
Maxaa ku dhici doona manfacyadayda haddii aan shaqada aado? ........ 9
Sideen ku heli karaa macluumaadka aan uga baahanahay dheefaha si aan u sameeyo doorashooyin xirfadeed oo wanaagsan? ........ 9
Maxaan sameeyaa haddii aanan ku raacsanayn DVR? ........ 10
La xidhiidh Barnaamijka Caawinta Macmiilka (CAP) ........ 10
Hababka Xallinta Khilaafaadka ........ 2
Adeegyada DVR ........ 3
Khibrad Shaqo Lacag lagu Qaato ........ 3
Tababarka Shaqada iyo Shaqaalaysiinta la Taageero ........ 5
Waa maxay tababaraha shaqada? ........ 5
Shaqaalaysiinta la Taageerayo ........ 5
Marka yoolkaaga Shaqadu uu u baahan yahay Tababar ........ 5
Waa maxay Tababarka Shaqada ........ 5
DVR ma kaa caawin kartaa tababarka shaqada? ........ 6
Maxaa layga filayaa haddii DVR ay iga caawiso waxbarashada dugsiga sare kadib? ........ 6
Adeegyada Iskaa-u-Shaqeysiga ........ 6
Marka ganacsiga yar uu shaqeynaayo: ........ 7
Adeegyada Dhalinyarada ee DVR ........ 8
Qorshaynta kasoo wareegida dugsiga iyo guurista shaqada ........ 8
Adeegyada Kala-guurka ee Shaqada kahor ........ 8
Waa maxay adeegyada ay bixiso VR ........ 8
Horusocod Shaqo ........ 9
Tignoolajiyada Baxnaaninta/Tignooloojiyada Kaalmaatiga ah ........ 10
Waa maxay Habka lagu Helo Adeegyada Tignoolajiyada Baxnaaninta? ........ 10
Barnaamijka Amaahda Qalabka La Qabsiga (AELP) ........ 11
Adeegyada kale ee laga heli karo Baxnaaninta Xirfadda ........ 12

Waaxda Dhagoolayaasha, Dadka Dhagaha Culus, iyo Dadka Maqalkoodu gadaal ka xumaaday .................................... 12
Adeegyada Nolosha ee Madaxa banaan .................................................................................................. 12
Waa maxay Barnaamijka Adeegyada Nolosha ee Madaxa banaan? ................................................................. 12
Khayraadka .................................................................................................................................. 2
Sideen u sameeyaa doorasho shaqo oo wanaagsan? ........................................................................................ 2
Baxnaaninta Xirfadda, Waxbarashada Dugsiga Sare kadib, Tababarka iyo Adiga: Hagaha Macmiilka ................................. 3
Waaxda Xafiisyada Baxnaaninta Xirfadda ............................................................................................... 6

## Hordhac

Buug-gacmeedkan waxaa loogu talagalay inuu bixiyo macluumaadka guud ee ku saabsan barnaamijka Baxnaaninta Xirfadda ee lagu bixiyo Waaxda Shaqada ee Maine, Xafiiska Adeegyada Baxnaaninta, Qaybta Baxnaaninta Xirfadda (DVR). Ujeeddadu waa inuu kaa caawiyo inaad fahanto barnaamijka oo uu sida ugu fiican kuugu shaqeeyo.

Barnaamijka Baxnaaninta Xirfadda Dadwaynaha waa natiijada sharciga federaaliga ah, Xeerka Baxnaaninta nuqulkii ugu danbeeyay Sharciga Hal-abuurka iyo Fursadaha Shaqaalaha. Sharcigan waxaa lagu aasaasay aaminsanaanta in dhammaan shakhsiyaadka naafada ah ay shaqayn karaan. Sida uu qabo sharcigan, gobol kasta wuxuu ku shaqeeyaa barnaamij isagoo kaashanaya dowladda federaalka. Kharashka sidoo kale waxaa wadaaga labada dawladood ee gobolka iyo federaalka. Hadafka barnaamijku waa in la caawiyo shakhsiyaadka naafada ah (dhallinyarada iyo dadka waaweynba) u diyaargarowga, helista, horumarinta iyo sii wadista shaqooyin wanaagsan.
La shaqeynta loo-shaqeeyayaasha waa arrin muhiim u ah barnaamijka VR. Xubnaha kooxda Baxnaaninta Xirfadda waxay ku hawlan yihiin wacyigelin ganacsi si ay u aqoonsadaan baahida shaqaalaha taas oo keenta in la daboolo farqiga u dhexeeya baahida loo shaqeeyaha iyo shaqo siinta shaqo-doonayaasha naafada ah. Intaa waxaa dheer, ka-qaybgelinta loo-shaqeeyaha waxay keenaysaa iskaashiyo sii kordhaaya iyo fursadaha dhallinta kala-guurka ku jira si ay u sahamiyaan dhinacyo kala duwan iyada oo loo marayo waraysiyo xog-waraysi ah, safarro shaqo iyo fursado shaqo oo kale oo waxbarasho ku salaysan.

Shaqadu waa arrin muhiim ah oo gacan ka geysanaysa taageeridda nolol loo dhan yahay oo bulshadaada dhexdeeda ah. Haddaan nahay DVR waxaan aaminsan nahay in qof walba uu diyaar u yahay shay, qof kastaa wuxuu diyaar u yahay inuu qaado tillaabo uu ku helaayo shaqada.

Kahor intaadan qaadan go'aanka codsiga waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad booqato barta internetka ee DVR. Websaydhka waxa ku jira macluumaadka ku saabsan barnaamijka VR oo ay ku jiraan adeegyada kala guurka, agabka iyo adeegyada dheeraadka ah ee Waaxda Shaqada. Si aad u codsato VR fadlan booqo codsiga Maine DVR si aad ugu hesho qaab onlayn ah ama nooca la daabacan karo.

WAAXDA
SHAQAALAHA EE
MAINE
*Qaybta Baxnaaninta Xirfadda*
Shuraako sharaf leh oo ka tirsan shabakadda
americanjobcenter

*Gobolka Maine waxa uu bixiyaa fursad siman oo xagga shaqada iyo barnaamijyada ah. Kaalmooyinka iyo adeegyada caawimada ayaa diyaar u ah shakhsiyaadka naafada ah haddii ay codsadaan.*
*Wac 207-623-6799. Isticmaalayaasha TTY waxay wacayaan Maine Relay 711.*

## Xaq ma u yeelan doonaa adeegyada DVR?

Markaad go'aansato inaad ka codsato adeegyada Qaybta Baxnaaninta Xirfadda (DVR), tallaabada xigta waa inaad si dhow ula shaqeyso La-taliyahaaga VR si loo go'aamiyo u qalmitaankaaga. Marka codsigaaga la helo, waxaa laguula soo xiriiri doonaa si aad ballan u qabsato. Macluumaadka ayaa la ururiyaa wakhtiga aad isdiiwaan gelinayso kaasoo ku saabsan sida naafadaadu u carqaladayso awooddaada shaqo, iyo haddii aad u baahan tahay adeegyo baxnaanin xirfadeed si aad u hesho, u ilaaliso, amau sii hormariso shaqada.

Hadafkayagu waa inaan samayno go'aaminta u-qalmitaankaaga sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah iyadoo la adeegsanayo tirada ugu yar ee imtixaanada iyo waraaqaha. Sharcigu wuxuu farayaa in habkan lagu dhameeyo muddo aan ka badnayn 60 maalmood. Haddii ay jirto baahi loo qabo in ka badan 60 maalmood, waqti kordhin gaar ah waxaa ku heshiin doona adiga iyo lataliyahaaga VR.

Go'aanka u qalmitaanka wuxuu noqon karaa mid degdeg ah haddii aad qaadato Caymiska Naafada ee Social Security (SSDI) ama Dakhliga Kaalmada ee Dhaqaalaha (SSI) oo aad qorsheyneyso inaad shaqo tagto.

Marka laga soo tago u qalmitaanka aasaasiga ah, DVR waxay hadda leedahay siyaasad mudnaan siinaysa dadka naafada ah. Tan waxa loo yaqaan Amarka Xulashada. Amarka Xulashada waa lama huraan marka baahida adeegyadu ay dhaafto ilaha wakaalada.

Marmar waxa laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto DVR inay diyaariso baadhitaano caafimaad ama qiimayno kale si loo go'aamiyo u qalmitaankaaga ama mudnaantaada hoos timaada Amarka Xulashada. Tani wax kharash ah kuuguma kacayso. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad ka qayb qaadato sida qiimayntan loo sameeyo, oo ay ku jirto xulashada bixiyeyaasha qiimayntan.

Tusaalooyinka qaar ka mid ah noocyada qiimeynta DVR waxaa ka mid ah:

- Uruurinta macluumaadka taariikhdaada iyo diiwaan kasta oo diiwaangeliya naafanimadaada
- Khibrad shaqo oo tijaabo ah
- Qiimaynta cilmi nafsiga
- Qiimaynta caafimaadka
- Kaala hadlida si loo go'aamiyo sida naafadaadu u saameyn karto shaqada
- Qiimaynaha kale ee aad go'aamisaan inay laga mamaarmaan yihiin adiga iyo lataliyahaaga VR

Marka la xaqiijiyo inaad u qalanto, tallaabada xigta waa abuurista Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqada (IPE).

Tilmaamo Waxtar leh

*Guji halkan si aad u aragto sharciyada DVR ee barnaamijka VR

* Booqo websaydka DVR si aad u aragto arjiga ama si aad u buuxiso codsiga khadka tooska ah

*Weydii haddii ay tahay inaad wax keento ballamahaaga. Marka ay suurtagal tahay hel diiwaannada caafimaadka ama waxbarashada ee ay u baahan doonto DVR.

### U qalmitaanka Ardayda Kala-guurka

- Ardayda da'doodu u dhaxayso 14-21, oo ku helaya adeegyada midkood IEP ama Qorshaha Qaybta 504
- Inuu leeyahay naafanimo qoran oo abuuraysa caqabad shaqo helid ama sii hayn ah; ama
- U baahan adeegyada VR si aad shaqo u hesho ama u sii haysato. Diiwaanada dugsiga sare iyo caafimaadka ayaa badanaa ku siin kara dukumentiyada lagama maarmaanka ah.
- Buuxi foomka diiwaan gelinta Ku-meel-gaarka ee Shaqada kahor ama codsiga VR

Ardeydu waxay noqon karaan kuwo u qalma adeegyada baxnaaninta xirfadda ama "laga yaabo inay u qalmaan".
Ardeyda “laga yaabo inay u qalmaan” waxaa ku jira shaqsiyaad ka diiwaan gashan VR balse aan codsan VR. Ardayda "U-Qalami Kara" waxay heli karaan Adeegyada Kala-guurka ee Shaqaalaysiinta Kahor.

Haddii ardaygu helo Caymiska Naafada ee Social Security (SSDI) ama Dakhliga Kaalmada Dhaqaale (SSI) oo ku salaysan naafanimadiisa/keeda oo uu danaynayo inuu shaqeeyo, ardaygu waxa loo qaadanayaa inuu u qalmo.

Fadlan ka eeg Qaybta Kala-guurka ee DVR ee bogga 17 wixii macluumaad dheeraad ah.

| Tilmaamo Waxtar leh |
|---|
| *Waxaa jooga la-taliyayaasha VR dugsi sare oo kasta gobolka oo dhan ah. Intaa waxaa dheer, La-taliyayaasha VR waxay la shaqeeyaan dhalinyarada guriga wax lagu baro ama taga machadyada kale ee waxbarashada |
| *Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, la xidhiidh xafiiska deegaankaaga si aad u waydiiso waraaqaha aad buuxinayso |

## Xulashada Macmiilka ee la Ogaysiiyay

Xulashada Macmiilka ee la Ogaysiiyay waa fikrad hagta dhammaan go'aan-qaadashada la samaynaayo inta lagu jiro khibradaada Baxnaaninta Xirfadda (VR). Sharciga baxnaaninta ayaa sheegaya in aad tahay iskaashade door siman ku leh dhammaan go'aanada la gaaro:

- Qiimayntaada
- Hadafyadaada shaqo
- Adeegyada Baxnaaninta Xirfadda
- Doorashada adeeg bixiyayaasha
- Siyaabaha lagu helo adeegyada Baxnaaninta Xirfadaha

Doorashada Xog-ogaalka ah waxay sidoo kale ka dhigan tahay in lagu ogeysiiyay dhammaan macluumaadka iyo fursadaha jira. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fahamka fursadahan ama taageerada fulinta hawlahan, waxaad waydiin kartaa la-taliyahaaga VR, qof aad taqaan, ama u doode ka socda Barnaamijka Caawinta Macmiilka (CAP).

Waa muhiim inaad si wadajir ah ula shaqeyso la-taliyahaaga VR iyo kuwa kale ee ku caawinaya inaad gaarto yoolkaaga shaqo. Waxaa jira arrimo saameynaya doorashooyinka sida: kartidaada iyo awoodaada, suuqa shaqada, arrimaha sharciga iyo amniga, waxtarka kharashka, ilaha dhaqaale ee la heli karo, iwm. Sidaa darteed, aad bay muhiim u tahay adiga iyo la taliyaha VR-gaaga inaad sahamisaan dariiqyada shaqo ee kuu horseedaya natiijooyin shaqo oo macno leh.

Xulashada Macmiilka ee la Ogaysiiyay waa aasaaska khibradaada VR. Inta badan kala hadal iskaashigan lataliyahaaga VR.

| Tilmaan Waxtar leh |
|---|
| *Waxaa muhiim kuu ah inaad la shaqeyso dhammaan dhinacyada go'aan qaadashada |
| *Ka fikir xiisahaaga shaqo ka hor inta aanad la kulmin lataliyahaaga VR. Si taxadar leh uga fakar waxa aad jeceshahay, waxaad neceb tahay, meelaha aad ku fiican tahay iyo baahiyahaaga. Haysashada fikrado aad kala hadasho la-taliyahaaga VR waxay kaa caawin kartaa inaad isbarataan |

## Sideen u horumariyaa qorshe wax ku ool ah oo macno leh oo Shakhsiyeed oo Shaqo?

### Waa maxay Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqada?

Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqada (IPE) waa dukumeenti la isku raacsan yahay oo ay qoreen adiga iyo la-taliyahaaga VR (VRC) kaas oo qeexaya yoolka dhabta ah ee adiga iyo qorshaha sida aad ku gaari karto yoolkaas. Waa natiijada falanqaynta waxyaabaha ay ka midka yihiin suuqa shaqada ee xaafaddaada, khibrad shaqo oo hore, dariiqooyinka shaqada, sida naafadaadu u saamaynayso awooddaada shaqo iyo nooca shaqada ee aad xiisaynayso. Qorshaha ayaa qeexaaya sida aad ku gaarayso shaqada adoo kaalmo ka helaaya adeegyada baxnaaninta xirfadda. IPE waxa lagu soo saari doonaa 90 maalmood gudahood kadib marka la xaqiijiyo inaad u qalanto adeegyada. IPE waxa lagu sameeyay iyadoo lagu salaynayo Qiimaynta Dhamaystiran ee Baahiyaha Baxnaaninta, taas oo ku salaysan macluumaadka aad la wadaagtay VRC-gaaga iyo macluumaadka aad ka heshay qorshaynta farsamada gacanta. Waxay tixgelin doontaa awoodahaaga gaarka ah, agabkaaga, mudnaantaada, welwelkaaga, kartidaada, danahaaga iyo xulashada xog ogaalka ah.

### Sidee iyo goorma ayaa abuurayaa Qorshaha Shaqsiga ee Shaqada?

Marka la go'aamiyo inaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyada Baxnaaninta Xirfadda, waxaad bilaabi kartaa abuurista IPE-gaaga. Hadafka iyo adeegyada looga baahan yahay qorshaha waxay ku saleysan yihiin fikradaada.  Hubi inaad ku darto dhammaan waxyaalaha saameeya shaqadaada.

Waxay kaloo ku salaysan tahay macluumaadka aad adiga ama kuwa kale bixisaan ee khuseeya awoodahaaga iyo danahaaga. Waxaa lagugu soo dhaweynayaa inaad ka qaybgeliso qoyska, asxaabta, xubnaha shabakada taageeradaada, u doodayaasha, ama khabiirada ka baxsan DVR.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Tusaalooyinka xirfadaha iyo kartida qaarkood waa isgaarsiin, is-dhiirigelin, go'aan qaadasho, si fiican ugu shaqeynta cadaadiska iyo maareynta wakhtiga. |

### Sideen u abuuraa Qorshe Shakhsiyeed Shaqo oo aniga igu habboon?

IPE waxa lagu abuuraa la kulanka VRC-gaaga si aad ugala hadasho oo aad u sahamisaan meelaha aad ku fiican tahay, kartidaada, awoodahaaga, danahaaga shaqo iyo xulashada xog-ogaalka ah.

Waxa laga yaabaa in laguu gudbiyo *Aqoon-is-weydaarsiga Sahaminta Xirfadaha* si loo baadho danaha xirfadaha, macluumaadka suuqa shaqada iyo shuruudaha shaqada.

Naadiga Shaqada waa fursad kale oo lagu hagi karo mowduucyada sida wareysiga, codsiyada, warqadaha shaqo doonka iyo goorta loo sheegi karo loo shaqeeyaha.

Waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad dhammaystirto qiimaynta xirfadaha si aad u sahamiso danaha xirfadda. Waraysiyo wargelin ah, tababaro shaqo, safar shaqo iyo khibrad shaqo oo mushahar leh ayaa lagugu dhiirigelinayaa si ay kaaga caawiyaan abuurista IPE-gaaga.

Tixraaca waxaa lagu talinayaa in lagu sameeyo baaritaan dheeri ah oo la xiriira naafada si loo ogaado awoodaha shaqeyneed (xakamaynta wax qaadista, iwm.) ama si loo go'aamiyo nooca la qabsashada looga baahan karo goobta shaqada ama goobta waxbarashada.

Waa muhiim inaad la wadaagto la-taliyahaaga VR taageerooyinka aad haysato ama laga yaabo inaad u baahato. Tusaalaha shabakada taageerada waa Clubhouse. DVR waxay si dhow ula shaqeysaa Clubhouse-yada kuwaas oo ku yaal Maine oo dhan.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Aqoon-is-weydaarsiga Sahaminta Xirfadda (CEW) iyo Naadiga Shaqada waa laba hawlood oo kugu hagaajin kara waddadaada shaqo. |

### Go'aaminta yoolka shaqada

Waxaa jira laba tillaabo oo waaweyn oo la xiriira abuurista IPE 1) go'aaminta yoolka shaqada iyo 2) go'aaminta sida aad ku gaari doonto yoolkaas.

Waxaa jira waxyaabo badan oo aad u baahan tahay inaad tixgeliso markaad go'aan ka gaareyso yoolka shaqada. Marka hore, waa maxay xirfadaha shaqo ee aad hadda leedahay? Shaqo noocee ah ayaa kugu habboon qof ahaan, iyadoo la tixgalinayo waxyaabaha ay ka midka yihiin xirfadahaaga, kartidaada iyo xiisahaaga hadda. Marka xigta fiiri shaqada lafteeda.

Qaar ka mid ah su'aalaha ay tahay in laga fikiro waxaa ka mid ah:

- Tani ma tahay shaqo ay ka jiraan fursado badan oo shaqo?
- Xagee joogaan loo-shaqeeyayaasha suurtagalka ah oo gaadiidku ma noqon doonaa caqabad?
- Waa maxay fursadaha la heli karo ee horumarinta xirfadeed?
- Maxay shaqadani bixin doontaa, taasina ma daboolaysaa baahiyahaaga?
- Ma jiraan dabacsanaan xagga xaaladaha shaqada?
- Maxaa agab ah oo aad u baahan doontaa si aad u gaadho yoolka?
- Haddii yoolku u baahan doono wakhti badan oo diyaargarow ah, miyaad awoodi kartaa inaad shaqo la'aan noqoto muddo dheer markaad isku diyaarinayso yoolka?

Adiga iyo lataliyahaaga VR waxa aad sahamin doontaan dariiqyada shaqada. Dariiqa shaqadu waa hab loo maro qorshaynta shaqada. Abuuritaanka dariiq shaqo waxa loola jeedaa diyaarinta koorsada lagu aqoonsanayo danaha shaqada, go'aaminta waxbarashada iyo baahida tababarka iyo dejinta qorshe hawleed lagu gaaro yoolalka shaqada. Dariiqa shaqadaada ayaa lagu qeexi doonaa IPE-gaaga.

La-taliyahaaga VR ayaa kaa caawin kara inaad doorato yoolka shaqada ee kugu habboon. La-taliyahaaga VR wuxuu hayaa macluumaad ku saabsan xirfado kala duwan, laga yaabaa inuu yaqaan dad kale ama waxqabadyo kaa caawin kara inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo kaa caawin kara inuu kugu hago habka aad go'aan u gaari lahayd. Waxa kale oo aad dooran kartaa in aad ku lug yeelato shakhsiyaad ka baxsan DVR oo door ku leh abuurista yoolkaaga shaqo.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan doorashada yoolka shaqada, eeg qaybta buug-gacmeedkan oo la yiraahdo, "Sideen Ku Sameeyaa Doorashada Xirfad Wanaagsan?" qaybta Ilaha xogta ee bogga 22.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Guji lifaaqyada soo socda si aad u hesho ilo waxtar leh si ay kaaga caawiyaan sahminta shaqada: |
| Xarunta Cilmi-baarista iyo Macluumaadka Shaqaalaha<br>Shabakadda Hoyga Shaqada<br>Maine Career Center<br>O*Net<br>Adeegyada Shaqada iyo Taageerada (Xafiiska Adeegga Waayeelka iyo Naafada) |

## Dejinta qorshe lagu gaaro yoolka

IPE-gaaga ayaa sharxi doona adeegyada aad u baahan doonto si aad u gaadho yoolkaaga, wakhtiga xaddidan, kharashyada la qiyaasay ee yoolka iyo adeegyada iyo masuuliyadaha qof kasta oo ku lug leh qorshahaaga.

Adeegyada ku jira qorshahan waa inay ahaadaan kuwa lagama maarmaanka u ah si loo gaaro yoolkaaga shaqo. Waxyaabaha ay tahay inaad tixgeliso waxaa ka mid ah:

- Maxaad u baahan doontaa si aad u gaarto yoolka?
- Ilaa intee ayay kugu qaadanaysaa inaad hadafkan gaadho?
- Waa maxay dariiqa ugu waxtarka badan ee lagu gaadho yoolka, marka la eego wakhtiga iyo kharashyada labadaba?
- Waa kuwee bixiyeyaasha suurtagalka ah ee adeegyada oo midkee adiga kuu fiican?
- Wax dhibaato ah ma kala kulmi doontaa helitaanka adeegyada aad u baahan tahay (sababtoo ah waxyaabaha ay ka midka yihiin gaadiidka, arrimaha naafada, iwm.)?

La-taliyahaaga VR ayaa awood u yeelan doona inuu kaa caawiyo inaad ogaato adeegyada aad u baahan karto si aad u gaadho yoolkaaga oo kuu sheegi kara waxa xeerarka DVR ay khuseeyaan. Adeegyada intooda badan, La-taliyahaaga VR

ayaa heli doona macluumaad ku saabsan cidda ku siin karta adeegyada aad u baahan tahay. DVR waxay kugu dhiirigelinaysaa inaad la hadasho bixiyeyaasha adeegga oo aad ka hesho macluumaad dheeraad ah iyaga ka hor inta aanad go'aansan kuwa aad dooranayso. Waxa kale oo aad dooran kartaa in aad ku lug yeelato shakhsiyaad ama khayraad ka baxsan DVR oo door ku leh abuurista IPE-kaaga.

IPE-ga waxa la qori karaa ilaa hal sano. Tusaale ahaan, waxaad filan kartaa inaad haysato ugu yaraan afar IPE haddii aad dhiganayso barnaamijka heerka koowaad ee afarta sano ah ee jaamacada. IPE-yada sidoo kale waxaa loo qori karaa hadafyada dhow, wax ka yar hal sano.

Marka adiga iyo la-taliyahaaga VR aad ku heshiisaan hadafkaaga shaqada iyo adeegyada aad u baahan tahay si aad u gaadho yoolkaas, qorshahaaga waa la qori karaa, adinka oo saxiixaya adiga iyo lataliyahaaga VR kadibna adeegyada ayaa bilaaban kara. Waxaad heli doontaa koobiga IPE-da iyo wax ka bedelka lagu sameeyay qorshaha. Wax ka beddelka ayaa dhacaya haddii ay jiraan wax isbeddel ah oo lagu sameeyay qorshahaaga. IPE waa la cusboonaysiin doonaa ugu yaraan hal mar sannadkii.

| Tilmaamo Waxtar leh |
| --- |
| *Waa muhiim inaad la xiriirto VRC-gaaga si aad u horumariso oo aad u ilaaliso IPE-gaaga. |
| *Beddelka saxiixida qorshaha shaqsi ahaan waa saxiixa elektarooniga ah.<br>VRC-gaagu wuxuu ku siin doonaa tilmaamo ku saabsan sida taas loo sameeyo koobiga IPE-gaaga. |
| *Hayso koobiga IPE-gaaga, dhamaan IPE-yada ayaa dib loo eegaa sanad walba. |

### Waxyaabaha ay DVR u baahan tahay inay eegto ka hor intaysan oggolaan IPE-gaaga

DVR waxay kula eegi doontaa arrimo badan si aad si wadajir ah ugu heshiisaan IPE-gaaga. Waxyaabaha ugu waaweyn ee ay DVR tixgelin doonto waa:

- Qorshuhu miyuu waafaqsan yahay xooggaaga, agabkaaga, mudnaantaada, welwelkaaga, kartidaada, awoodaada, danahaaga, iyo xulashada xog ogaalka ah?
- Adeegyada la codsaday ma yihiin kuwo muhiim u ah gaaritaanka yoolkaaga?
- Xogta suuqa shaqadu ma taageertaa yoolkaaga aagga aad dooratay?
- Sidee qorshaha loola socon doonaa si loo xaqiijiyo natiijo guulaysata?
- Waqtiyada xaddidan ma yihiin kuwo waaqici ah oo lagu gaarayo yoolkaaga?
- Ma la sahamiyay ilo kale oo maalgelin ah, marka ay habboon tahay?
- Ilaha lacag bixinta ma lagu aqoonsaday qorshaha?
- Adeegga ma loo bixiyaa habka ugu kharash jaban?
- daawaynta ama caawimaada aad u baahan tahay si aad u guulaysato qorshaha ma lagu sheegay?
- Adeegyadu miyay waafaqsan yihiin xeerarka iyo shuruucda DVR?

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Ilaali balamaha la qorsheeyay. Balamada maqan waxay dib u dhigi kartaa barnaamijkaaga.<br>Haddii ay qasab kugu tahay inaad joojiso, xili hore wac oo dib u dhig. |

### Maxaa dhacaya haddii aan rabo inaan beddelo IPE AMA haddii aan u baahdo adeegyo dheeraad ah?

Waa muhiim inaad isla markiiba la xiriirto la-taliyahaaga VR si aad ugala hadasho isbedel kasta oo ku yimaadda IPE-gaaga. Marka isbeddelada lagu heshiiyo, IPE waa la beddeli doonaa. Adiga iyo lataliyahaaga ayaa dib u eegi doona oo cusbooneysiin doona qorshahaaga ugu yaraan hal mar sanadkii, xitaa haddii aysan jirin isbedelo waaweyn.

La-taliyahaaga VR waa qofka muhiimka ah ee aad u raadsan karto jawaabaha. Bixinta adeeg kasta oo gaar ah waxay ku salaysan tahay baahiyaha gaarka ah. Haddii la-taliyahaagu uusan uga jawaabi karin su'aalahaaga heer aad ugu qanacdo, waa inaad codsato inaad la hadasho kormeeraha DVR. Haddii aadan weli ku raacsanayn DVR, waxaa jira habab kale oo ku caawin kara. Si aad u hesho macluumaad intaas ka badan oo arrintan ku saabsan, ka eeg "Maxaan Sameeyaa Haddii Aanan Ku raacsanayn VR?" bogga 10 ee buug-gacmeedkan.

### Yaa bixinaya kharashka adeegyada aan u baahanahay?

Qof kasta qorshihiisa gaarka ah ee shaqaalaynta wuu ka duwan yahay kan dadka kale. Waxay qeexaysaa yoolka shaqada, adeegyada loo baahan yahay si loo gaaro yoolkaas iyo heshiiska adiga iyo DVR. Khayraad badan ayaa laga yaabaa in loo isticmaalo in lagu daboolo kharashyada adeegyada hoos yimaada Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqaalaysiinta, oo ay ku jiraan ilahaaga, ilaha qoyskaaga, caymiskaaga ama dheefahaaga, barnaamijyada kale ee dadweynaha iyo/ama DVR. Qorshe kasta oo Shakhsi ahaaneed ee Shaqaalaynta waa inuu si taxadar leh u qeexaa cidda ka mas'uulka ah bixinta adeegyada.

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad si ikhtiyaari ah ugu biiriso khayraad kharashka Qorshahaaga gaarka ah ee Shaqada. Tusaalooyinka sida aad wax ugu biirin karto waxaa ka mid ah: inaad ku siiso bixiyha qayb ka mid ah kharashka adeegyada aad u baahan tahay, agabka noociisa ah ama helitaanka qaar ka mid ah adeegyada keliga ah. DVR waxay si xoog leh u aaminsan tahay in maalgashiga shakhsi ahaaneed ee qof kastaa uu yahay qayb muhiim ah oo ka dhigaya Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqaalaynta mid macno leh oo guuleysta. Si kastaba ha ahaatee, lagaagama baahna inaad wax ku darsato qorshahaagana lama sii hayn karo haddii aanad awoodin inaad wax ku darsato.

Kahor inta aan la isticmaalin lacagaha DVR, waxaan u baahanahay inaan eegno agabyada kale ee la heli karo. Ma jiraan ilo kale (sida wakaaladaha kale, caymiskaaga caafimaadka, kaalmada dhaqaale ee waxbarashada dugsiga sare kadib, faa'iidooyinka shaqaalaha) kuwaas oo bixin doona adeegyada aad u baahan tahay. Waxa laga yaabaa in lagaaga baahdo inaad codsato agabkan kale. DVR waxay sidoo kale isticmaali doontaa agab kasta oo kale oo diyaar u ah xagga kharashyada Qorshahaaga Gaarka ah ee Shaqada.

DVR waxaa laga yaabaa inay bixiso adeegyada ama alaabta aan laga helin ilo kale oo lagu heshiiyey kuna jira Qorshahaaga gaarka ah ee Shaqada. Alaabtan iyo adeegyadan waa in lagu iibsadaa hab waafaqsan siyaasadaha wax iibsiga ee Gobolka iyo DVR. DVR waxa ay awood u leedahay oo kaliya in ay isticmaasho adeeg bixiyayaasha ku waafaqa xeerarkan iyo shuruudahan.

Waxaad dooran kartaa adeegyo ay DVR kugu siin karto kharash jaban meel kale, laakiin waxaa laga yaabaa inaad bixiso faraqa u dhexeeya.

Shakhsiyaadka hela Dakhliga Dheeraadka ah ee Badbaadada (SSI) iyo/ama Caymiska Naafada ee Lambarka Bulshada (SSDI) ayaa laga yaabaa inay u qalmaan barnaamijka Tigidhada Shaqada. Maamulka Lambarka Bulshada ayaa bixiya kharashka DVR marka dadka tigidhada sita ay ku gaadhaan dakhligooda mushahar la taaban karo.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan cidda bixinaysa adeegyada Qorshahaaga gaarka ah ee Shaqada, fadlan weydii la-taliyahaaga VR. Waa muhiim inaad ogaato cidda bixinaysa iyo kharashka ku baxaya adeegyada iyo alaabta ee Qorshahaaga gaarka ah ee Shaqada. Aqoontan ayaa kaa caawin doonta inaad samayso go'aamo wanagsan oo ku saabsan adeegyada aad hesho.

Tilmaan Waxtar leh

Tusaalooyinka faa'iidooyinka isbarbardhigga ah waa; Gargaarka Dhaqaale, Caymiska Caafimaadka, Gaadiidka Dadweynaha, Faa'iidooyinka shaqaalaha.

Riix halkan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka Ticket to Work.

## Marka aad gaarto yoolkaaga shaqo

La-taliyahaaga VR wuxuu sii wadi doonaa xiriirkaaga inta lagu jiro sagaashanka (90) maalmood ee ugu horreeya ee shaqada, ama ka badan haddii loo baahdo, si loo hubiyo in shaqadaadu tahay mid lagu qanacsan yahay. Ogolaanshiyahaaga, La-taliyahaaga VR wuxuu la xiriiri karaa kormeerahaaga si uu ugala hadlo horumarkaaga shaqada.

DVR waxay ku siin kartaa caawimo farsamo adiga iyo loo-shaqeeyahaaga si aad u ogaatid siyaabaha aad ku dabooli lahayd baahiyahaaga la xidhiidha naafanimada. Tan waxa ku jiri kara qalab gaar ah ama dib u habaynta goobta shaqada.

Marka la shaqeeyo iyo ka hor xiritaanka guusha leh, adeegyada shaqada kadib waa la bixin karaa haddii adeegyadu ay xaddidan yihiin baaxadda iyo muddada. Adeegyada shaqada kadib waxay ku kooban yihiin hal ama laba adeeg muddo ka yar lix (6) bilood. Adiga iyo la-taliyahaaga VR waxa aad wax ka beddeli doontaan Qorshahaaga Gaarka ah ee Shaqada haddii taageerooyinka shaqada kadib loo baahdo. Haddii aad kala kulanto dhibaatooyin sii wadista shaqadaada, fadlan la xidhiidh la-taliyahaaga VR.

Haddii kiiskaaga VR uu xiran yahay oo aad u baahan tahay gargaar dheeraad ah waxaad u baahan doontaa inaad dib u codsato adeegyada adiga oo buuxinaya codsiga Baxnaaninta Xirfadda.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Marka aad shaqaynaysay oo aad ku xasilloonaato shaqadaada DVR waxay sugi doontaa ugu yaraan 90 maalmood si ay u xidho kiiskaaga. |

## Adeegyada ay DVR bixin karto

Kuwa soo socdaa waa liiska noocyada adeegyada ay DVR bixin karto, haddii loo baahdo iyaga oo qayb ka ah IPE-gaaga. Buug-gacmeedkan oo dhan waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mawduucyada hoose. Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad waydiiso la-taliyahaaga VR ama shaqaalaha kale ee DVR haddii aad qabto su'aalo ku saabsan helitaanka ama baahan tahay adeeg kasta. Tusaalooyinka adeegyada aasaasiga ah ayaa hoos ku taxan:

- La-talin, hagitaan, iyo macluumaadka ku saabsan shaqada iyo go'aamada shaqada
- Adeegyada qiimaynta si loo go'aamiyo u-qalmitaanka iyo baahiyaha baxnaaninta xirfadda. Iyadoo ku xiran xaaladaada, tani waxaa ku jiri kara waxyaabo ay ka mid yihiin fursadaha lagu eegi karo goobaha shaqada ee dhabta ah, ka shaqeynta shaqada si tijaabo ah, baaritaan caafimaad ama maskaxeed, ama siyaabo kale oo aad wax badan uga barato naafanimadaada iyo baahiyaha baxnaaninta xirfadda.
- U dirida adeeg bixiyayaasha kale ee adeegyada aan laga helin barnaamijkan
- Adeegyada meelaynta shaqada
- Tababarka shaqada iyo adeegyada kale ee tababarka
- Adeegyada soo celinta jidhka iyo maskaxda
- Adeegyada iskaa-u-shaqeysiga, oo ay ku jiraan kaalmada farsamada iyo la-talinta aasaasida hawlaha ganacsiga yaryar
- Shatiyada shaqada, agabka, qalabka, iyo kaydadka bilowga ah iyo saadka
- Tignoolajiyada Baxnaaninta/Tignoolajiyada Caawinta
- Tababarka shaqada iyo adeegyada shaqada ee la taageeray
- Adeegyada kala-guurka ee shakhsi ahaaneed si loo taageero dhaqdhaqaaqa dugsiga ilaa shaqada
- Adeegyada Kala-guurka Kahor Shaqaalaysiinta ee ardayda naafada ah

### Adeegyada Taageerada

Adeegyada taageerada sidoo kale waxaa la geyn karaa si ay u taageeraan adeegyada aasaasiga ah ee kor lagu soo sheegay. Dhammaan kharashyada taageerada waxay u baahan yihiin inay noqdaan kuwo macquul ah, lagama maarmaan ah oo kharash-ool ah. Tusaalooyinka adeegyada taageerada qaarkood waa:

- Adeegyada xubnaha qoyska, haddii loo baahdo qofka naafada ah si uu u gaaro yoolka shaqada
- Kharashyada lacagaha dheeraadka ah ee la galay markaad ka qaybqaadanayso qiimeynta DVR ama Qorshaha Gaarka ah ee Shaqada
- Adeegyada gaadiidka
- Adeegyada kaalmada shakhsi ahaaneed. Kuwani waa adeegyo uu u baahan yahay shaqsi si uu uga caawiyo fulinta hawlo nolol maalmeedka taasoo ka dhalatay naafanimada taasoo lagama maarmaan u ah qofka si uu u gaaro yoolka shaqada.
- Adeegga turjubaanka ama akhristaha
- Adeegyada shaqada kadib si ay u caawiyaan shakhsiyaadka si ay shaqadooda u sii wataan, si ay u helaan shaqo isku mid ah ama la xidhiidha, ama si ay u horumariyaan shaqadooda

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Adeegyada ay bixiso VR waa inay raacaan Xeerarka barnaamijka. |
| Faa'iidooyinka la barbardhigi karo waa lacag la heli karo iyada oo loo marayo agabyada kale ee laga yaabo inay diyaar u yihiin inay ka caawiyaan bixinta adeegyada qaarkood ee ku qoran IPE-gaaga. |

## Maxaa ku dhici doona manfacyadayda haddii aan shaqada aado?

Haddii aad hesho lacag caddaan ah ama dheefo caafimaad oo ku salaysan naafanimada (sida Caymiska Naafada ee Lambarka Bulshada, Dakhliga Kabista Dhaqaalaha, Kaabista Gobolka, Medicare iyo/ama MaineCare, waxaa jira abaal marinno lagugu dhiirigelinayo in aad isku daydo shaqada adigoo weli gunnooyinka qaadanaya.  Waa muhiim inaad hesho macluumaad sax ah si aad u gaadho go'aano wanaagsan oo ku saabsan yoolalkaaga xirfadeed, dakhligaaga suurtogalka ah iyo baahidaada caymiska caafimaadka KAHOR intaadan bilaabin qorshaha shaqada.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Haddii aad tahay qaataha SSDI/SSI, iska hubi inaad wax ka waydiiso Kharashyada Shaqada ee Xaafada La Xidhiidha (IRWE's) |

### Sideen ku heli karaa macluumaadka aan uga baahanahay dheefaha si aan u sameeyo doorashooyin xirfadeed oo wanaagsan?

Qof kasta dheeftiisa waa u gaar. Dhiirrigelinta shaqadu waxay khusaysaa qof walba iyadoo lagu saleynayo xaaladihiisa gaarka ah. Sida ugu fiican ee aad ku heli karto xogta saxda ah ee shaqada iyo sida ay u saamaynayso manfacyadaada waa in aad la xidhiidho isha faa'iidooyinka, ie Department of Health and Human Services; Maamulka Lambarka Bulshada; Guriyeynta Gobolka Maine; ama la xidhiidh Khabiir ku taqasusay Faa'iidooyinka oo leh tababar balaadhan oo ku saabsan dhiirigelinta shaqada iyo barnaamijyo kale oo badan oo faa'iidooyin ah.

Maine Medical Centre waxay bixisaa Adeegyada La-talinta ee Gobolka oo dhan. VRC-gaaga ayaa kaa caawin doona inaad buuxiso xirmo tixraac ah si aad ula kulanto La-taliyaha Dhiirigelinta Shaqada Bulshada (CWIC). CWIC waxay ka jawaabi kartaa su'aalahaaga ku saabsan shaqada iyo dheefaha waxayna kaala hadli doontaa waxa dhiirigelinta shaqada ah ee aad heli karto.

CWIC waxay meesha ka saari kartaa khuraafaadka badan ee ku xeeran faa'iidooyinka iyo shaqada. Inta badan waxaan ka maqalnaa qaataha cabsida ay ka qabaan lumin SSI/SSDI iyo daryeelka caafimaadka, sida MaineCare ama Medicaid. Markaad la kulanto CWIC, waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan sida labadan cabsi ee ugu sarreeya ay yihiin khuraafaad. Waxa jira dhiirigelino badan oo meesha yaala si aad u taageerto go'aankaaga shaqo. Waxaad sidoo kale maqli doontaa faa'iidooyinka dheeraadka ah ee shaqada, sida, kordhinta dakhliga bishii, isdhexgalka iyo is-daryeelka.

Barnaamijka Tigidhada Shaqada waxaa bixiya Maamulka Lambarka Bulshada. Waa barnaamij iskaa wax u qabso ah oo loogu talagalay in lagu caawiyo dadka iinta ka helaya Lambarka Bulshada si ay u helaan shaqo macno leh. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah la hadal la-taliyahaaga VR ama Maamulka Lambarka Bulshada.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Haddii aad tahay qof qaata Dheefaha Lambarka Bulshada, tixraac ayaa laguu samayn doonaa si aad u aragto Isku-Duwaha Dhiirigelinta Shaqada Bulshada (CWIC) inkastoo Maine Medical Center si looga hadlo faa'iidooyinka iyo dhiirigelinta shaqada. |
| Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa adigoo booqanaya Xarunta Caafimaadka Maine Adeegyada La-talinta Faa'iidada. |

## Maxaan sameeyaa haddii aanan ku raacsanayn DVR?

Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka ay DVR adiga kugu saabsan tahay, waxaa jira dhawr ikhtiyaar oo lagu xallinayo khilaafka. Hoos waxaa ku yaal sharraxa qaar ka mid ah xulashooyinkaas oo loogu talagalay inay ku caawiyaan adiga iyo DVR inaad horay u sii socotaan qorsheynta baxnaaninnadaada xirfadeed.

Kala hadal arrinta DVR Haddii aad khilaaf ka qabtid, DVR waxay kugu dhiirigelinaysaa inaad marka hore kala hadasho welwelkaaga Lataliyahaaga VR. Tani waa sida ugu dhaqsiyaha badan uguna fudud ee lagu xalin karo khilaaf kasta. Haddii aadan awoodin inaad xalliso khilaafaadkiina adigoo la hadlaya lataliyahaaga VR, waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad kala hadasho arinta wakiilka kale ee DVR, sida kormeeraha, maareeyaha gobolka ama maareeyaha xafiiska dhexe ee DVR. Xafiiska DVR ee deegaanka ayaa ku siin kara macluumaad ku saabsan sida loola xiriiro mid ka mid ah shaqsiyaadkan.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Ha sugin inaad u sheegto VRC-gaaga haddii aad wax su'aalo ah qabtid ama aadan ku raacsanayn go'aanka. |

### La xidhiidh Barnaamijka Caawinta Macmiilka (CAP)

Barnaamijka Kaalmada Macmiilka (Client Assistance Program) (CAP) waxaa maamula Xuquuqda Iinta Maine (DRM). CAP waxay siisaa macluumaad, talo, u doodid iyo, haddii la go'aamiyo lagamamaarmaan, matalaad sharci ah dadka welwelka ka qaba adeegyada baxnaaninta ee ay ka helaan DVR. CAP waxa looga baahan yahay in uu isticmaalo habab aan rasmi ahayn, ie gorgortan, xalinta isku dhacyada, ilaa iyo inta ugu badan ee suurtogalka ah, ka hor inta aan la qaadin hab rasmi ah ama mid sharci ah sida dhexdhexaadinta ama Dhegeysiga Nidaamka Xuquuqul Insaanka. Kiis kastaa waa mid gaar ah, mararka qaarkoodna, waxaa la go'aamin karaa in sida kaliya ee lagu xallin karo khilaafka ay tahay in si toos ah loo aado Dhexdhexaadinta iyo Dhegeysiga Nidaamka Xaqsoorka leh.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato hab kasta oo lagu xallinayo khilaafka soddon (30) maalmood gudahooda ee khilaafka, iyadoo la kaashanayo ama la'aanteed gargaar CAP. Dhammaan talooyinka iyo wada-hadallada CAP waa qarsoodi oo ma saameynayaan adeegyadaada si xun.

Macluumaadka xiriirka ee Xuquuqda Naafada Maine

Augusta
160 Capitol Street, Suite 4
Augusta, ME 04330
800-452-1948 (V/TTY)
207-626-2774 (V/TTY)
207-621-1419 (Fakis)
advocate@drm.org

Falmouth
1 Macworth Island, Building C
Falmouth, ME 04105
800-639-3884 (V/TTY)
207-797-7656 (V/TTY)
207-766-7111 (VP)
207-797-9791 (Fakiska)
deafservices@drme.org

Haddii aad rabto inaad caawimo ka codsato websaydka DRM, booqo https://drme.org/online-intake-form.

**Hababka Xallinta Khilaafaadka**:
gorgortanku waxa uu inta badan ku lug leeyahay ka caawinta xidhiidhka adiga iyo lataliyahaaga VR ama ka wada hadalka siyaabaha kala duwan ee looga gudbi karo khilaafyada. gorgortanku inta badan waa habka ugu dhaqsaha badan ee lagu xaliyo dhibaatada.

Dhexdhexaadintu waa hannaan xalinta khilaafaadka aan rasmiga ahayn ee ikhtiyaari ah kaas oo dhexdhexaadiyaha, oo aan ahayn shaqaale DVR, uu ku caawiyo adiga iyo DVR si aad heshiis u gaartaan. Dhexdhexaadiyuhu awood uma laha inuu go'aan u gaadho adiga ama DVR. Haddii aad heshiis la gasho DVR, heshiiska waxaa lagu qori doonaa oo aad saxiixday adiga iyo DVR. Waxaad heli doontaa nuqul ka mid ah heshiiskan. Noocan xallinta khilaafaadka waxa la bixin karaa oo keliya haddii labadiina adiga iyo DVR aad ku heshiisaan inaad ka qayb-qaadataan dhexdhexaadinta.

Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq dhowrka leh, waxaad u soo bandhigi doontaa xogta aad ku muransan tahay sarkaalka dhegeysiga, oo aan ahayn shaqaale DVR. Nidaamku aad buu uga rasmi yahay xogta aad soo bandhigtay adiga iyo DVR labadaba aad bay ugu lug badan yihiin dhexdhexaadinta. Dhegeysiga Nidaamka Xuquuq dhowrka leh, labadiinaba adiga iyo DVR waxaa sida caadiga ah wakiil ka ah u doodeyaal ama qareenno waxaana laga yaabaa inaad wacdo markhaatiyaal. Habka jadwalka, qabashada dhageysiga iyo samaynta go'aanka sarkaalka dhagaysiga guud ahaan waxay qaadataa wax ka badan inta ay qaadato Dib u Eegista aan Rasmiga ahayn. Haddii aadan ku raacsanayn go'aanka sarkaalka dhegeysiga, waxaad ka racfaan ka qaadan kartaa go'aanka iyada oo loo marayo nidaamka maxkamadda.

Codsiyada Dhexdhexaadinta iyo Dhegaysiga Nidaamka Xaqsoor waa in ay ahaato mid qoraal ah oo loo diro Agaasimaha DVR. Ciwaanka xafiiska maamulka ee DVR waxa laga heli karaa dhammaadka buug-gacmeedkaan. Haddii aad go'aansato inaad rabto inaad marto mid ka mid ah hababkan, DVR waa inay ku hesho codsigaaga soddon (30) maalmood gudahood kadib marka DVR ay kugu wargeliso go'aanka aad diidan tahay.

Mid ka mid ah hababkaan, waxaad xaq u leedahay inaad keento wakiil (tusaale, u doodaha CAP, qareen, xubin qoyska ka tirsan, iwm.). Si kastaba ha ahaatee, DVR mas'uul kama noqon doonto kharashaadkaaga keenista wakiilka (sida khidmadaha uu qaado qareenka gaarka ah).

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Codsiyada Dhexdhexaadinta iyo Habraaca Xaqsoor waa inay ahaadaan qoraal oo loo diraa Xafiiska Maamulka si uu ula socdo Agaasimaha DVR |

# Adeegyada DVR

## Khibrad Shaqo Lacag lagu Qaato

Khibrad shaqo lacag lagu qaato ayaa kuu ah fursad aad ku tijaabiso hal ama dhowr shaqo oo bulshada dhexdeeda ah. Khibrad shaqo lacag lagu qaato ayaa laga yaabaa inay kaa caawiso inaad wax badan ka ogaato shaqooyinka ku habboon danahaaga iyo kartidaada ama waxay kaa caawin kartaa inaad dhisto taariikhdaada shaqo.  Doorashada shaqadu waxay ku salaysnaan doontaa danahaaga, kartidaada, iyo baahiyahaaga. Waayo-aragnimada shaqadu way kala duwanaan kartaa muddo ahaan iyadoo ku xidhan xaaladdaada gaarka ah, waxa lagu siin doonaa lacagta shaqada aad qabato inta lagu jiro waayo-aragnimada, badanaa qiimaha caadiga ah ee booskaas. Mushaharka waxaa lagu bixiyaa wakaalad ku meel gaar ah oo qandaraas lagu siiyay VR.

Marka lagu heshiiyo in aad ka faa'iidaysan doonto khibrad shaqo oo lacag laguq aato, La-taliyahaaga VR ayaa aqoonsan doona taageerada loo baahan yahay si loo sugo goobta shaqada. Tan waxa ku jiri kara la shaqaynta shaqaalaha kale ee DVR ama u gudbinta Bixiyaha Baxnaaninta Bulshada.  Kahor inta aysan bilaaban waayo-aragnimada shaqada, waxaad u baahan tahay inaad ka qayb qaadato go'aanka ku saabsan nooca shaqada ee aad qaban doonto. Waa muhiim inaad ogeysiiso la-taliyahaaga VR iyo qiimeeyaha inay ogaadaan wax kasta oo ka caawinaya inay helaan goobta saxda ah ee khibradda shaqada.

Kahor iyo inta lagu jiro waayo-aragnimada shaqada, waxaa muhiim ah inaad fahamto waxa lagaa filayo. Ka qaybgal wanaagsan ee shirarka qorshaynta iyo shaqada, imaatinka wakhtiga, dharka saxda ah iyo la dhaqanka madaxa iyo shaqaalaha, had iyo jeer waa muhiim. Intaa waxaa dheer, shaqada gaarka ah ee lagugu qiimeeyo waxay u badan tahay inay lahaan doonto shuruudo kale oo aad u baahan doonto inaad ogaato.

Marka waayo-aragnimada shaqo la dhammeeyo adiga iyo VRC-gaaga waxaad ka wada hadli doontaan natiijooyinka si loo go'aamiyo tallaabooyinka xiga. Jawaab celintaada ku saabsan waayo-aragnimada shaqo waa muhiim si loo horumariyo tillaabooyinka xiga. Si wada jir ah, adiga iyo lataliyahaaga VR waxa aad eegi doontaan dhinacyo badan oo ka mid ah waxqabadkaaga shaqada sida: xirfadahaaga shaqo, dabeecadahaaga, xidhiidhka aad la leedahay madaxa shaqada iyo asxaabtaada, xaadiritaanka, iyo dulqaadka shaqada. Ka qaybqaadashada khibrada shaqo ee mushaharka leh, waxaad ka heli doontaa fursad aad ku aragto sida aad u jeceshahay shaqada iyo sida aad ugu fiican tahay shaqada. Khibrad shaqo ayaa laga yaabaa in lala sameeyo loo shaqeeyaha haya shaqo furan, haddii ay ku qanacsan yihiin shaqadaada, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo shaqo. Kadib marka waayo-aragnimada shaqadu dhammaato, adiga iyo la-taliyahaagu waxaad heli doontaan warbixin ka socota qiimeeyaha oo sheegaysa sida aad samaysay, haddii shaqadu ay u muuqato mid kugu habboon iyo haddii aad u baahan tahay adeegyo kale si aad u guulaysato.

Ugu dambeyntii, waxaa muhiim ah inaad weydiiso su'aalo kasta oo aad qabtid iyo inaad bixiso jawaab celin inta lagu jiro habka.

| Tilmaan Waxtar leh |
|---|
| Goobaha waayo-aragnimada shaqada waxaa lagu go'aamin doonaa danahaaga, kartidaada, baahida loo-shaqeeyaha iyo dookhyada gaadiidka. |
| Mararka qaarkood waayo-aragnimada shaqo ee mushaharka leh waxay kuu horseedi kartaa shaqo buuxda haddii shaqadu ay tahay mid kugu habboon |

Markaad adiga iyo lataliyahaaga VR go'aansataan inaad diyaar u tahay inaad shaqo hesho, lataliyahaaga VR ayaa kaala shaqayn doona sidii aad shaqo u heli lahayd ama u diyaarin lahayd adeegyo kale, haddii loo baahdo, si ay kaaga caawiyaan inaad shaqo hesho.

Raadinta shaqo waxay u baahan tahay dadaal culus. Si aad ugu guulaysato helitaanka shaqada aad rabto, muhiim ayay kuu noqon doontaa in aad qaybtaada helitaanka qabato. Hadba inta badan ee aad shaqo raadsato, ayay sii kordhayaan fursadahaaga shaqo. Waxyaalaha qaar oo aad samayn karto waa iska diwaan gelinta Maine Job Link, adeegga CareerCenter, ee Waaxda Shaqada, iyo akhrinta boggaga shaqo raadinta. Waxa jira tiro adeegyo ah oo laga yaabo inay DVR bixiso si ay kaaga caawiyaan meelaynta, iyadoo ku xidhan baahiyahaaga, oo ay ku jiraan kuwan soo socda:

- Xirfadaha Shaqo Raadinta (JSS) - JSS waxay kaa caawinaysaa xirfadaha waraysiga: qorista warqada shaqo raadinta iyo farsamooyinka codsiga si ay kaaga caawiyaan inaad u diyaargarowdo shaqo raadis. JSS waxa laga yaabaa inay noqoto caawimo gaar ah ama waxa loo bixiyaa ayadoo ah qayb ka mid ah fasalka

- Kaalmada Meelaynta Shakhsi ahaaneed - La-taliyahaaga VR ayaa kaa caawin kara inaad aqoonsato loo-shaqeeyayaasha maxalliga ah kuwaas oo laga yaabo inay hayaan shaqo ka banaan aaga aad xiiseynayso ama kaala taliyaan waraysiga iyo qorista warqada shaqada. Haddii loo baahdo, waxaa laguu diyaarin karaa qof kugu weheliya waraysiyada
- U-gudbinta aqoon-is-weydaarsiyada sida xirfadaha qorista warqada shaqada iyo wareysiyada.
- Shaqooyinka maxaliga ah ee furan, la socodka loo shaqeeyayaasha, iyo taageerada joogtada ah
- Khibrad shaqo oo mushaar leh - Khibrad shaqo oo mushaar leh ayaa kuu ah fursad aad ku tijaabiso shaqo si aad u go'aamiso haddii aad ku habboon tahay nooc shaqo gaar ah
- Tababaraha shaqada ayaa ku raaci kara si uu kaaga caawiyo barashada shaqada iyo si uu u ilaaliyo waxqabadkaaga. Loo-shaqeeyaha ayaa laga yaabaa inuu ku siiyo shaqo haddii aad si fiican u qabato xilliga qiimeynta
- Barnaamijka Tababbarka Maine, oo ay weheliso DVR, waxay gacan ka geysataa dejinta barnaamijyo habaysan, oo hadda dabacsan oo tababbar oo loogu talagalay in lagu barto shaqada iyo waxbaridda fasalka la xidhiidha.
- Aqoon-is-weydaarsiga Sahminta Xirfadda (CEW) waa cashar aad ku sahamin doonto meelaha shaqada ee aad xiisaynayso, iyo sidoo kale daaha ka qaadi doona xirfadaha iyo kartida adiga kuu gaar ah. Aqoon-is-weydaarsiga waxaa inta badan lagu qabtaa CareerCenter, dugsiga, ama hay'ad iskaashi aan la leenahay. Waxa fududayn kara shaqaalaha DVR ama iyada oo lala kaashanayo kuwa kale
- Naadiga Shaqada waa shir kooxeed yar oo macmal ah si ay u taageeraan shaqo raadintaada. Dhowr mawduuc ayaa laga hadlayaa, la-taliyayaashuna waxay diyaar u yihiin in ay ka jawaabaan su'aalaha la xidhiidha mawduucyadan
- Tababarka Shaqada (OJT) waa heshiiska u dhaxeeya loo shaqeeyaha iyo DVR markaas oo loo shaqeeyuhu aqbalo inuu shaqaaleysiiyo shaqsi oo uu tababaro halka DVR ay ka caawinayso kharashyada bilowga ah ee tababarka iyo taageerada. Marka loo-shaqeeyaha la helo heshiis qoraal ah ayaa la samayn doonaa oo u dhexeeya adiga, loo shaqeeyaha iyo DVR. Qandaraaskan waxa ku jira mushaharka saacadii ee aad ka heli doonto loo-shaqeeyaha, saacadaha tababarka ee aad qaadan doonto, iyo wakhtiga ay kugu qaadanayso in aad hesho xirfadaha heerka gelitaanka.

Tilmaan Waxtar leh

Isku xirka qoyska iyo asxaabta waxay inta badan u horseedi kartaa fursado shaqo.

Riix halkan si aad u hesho wax badan oo ku saabsan Barnaamijka Tababbarka ee Maine

Aqoon-is-weydaarsiga Sahaminta Xirfadda iyo Naadiga Shaqada waa laba hawlood oo kooxeed oo yar oo kaa caawin kara aqoonsiga waddada shaqadaada.

La-taliyaha VR ayaa kula shaqayn doona si uu ugu habeeyo adeegyada ku habboon baahiyahaaga, sida kiiska Ryan:

*"Ryan", oo ah nin dhalinyaro ah oo leh taariikh isku day shaqo oo fashilmay, wuxuu la shaqeeyay VRC iyo Bixiyaha Baxnaaninta Bulshada si uu u helo shaqo ku habboon baahidiisa. Waxa uu ku koray awoodiisa in uu aqbalo jawaab celin wax ku ool ah oo hadda wuxuu xiriir weyn la leeyahay qofka uu u shaqeeyo iyo shaqaalaha la shaqeeya. Waxa uu dhawaan u sheegay VRC-giisa "Ma rafaadsani hadda kadib".*

## Tababarka Shaqada iyo Shaqaalaysiinta la Taageero

### Waa maxay tababaraha shaqada?

Tababaraha shaqadu waa qof bixiya taageerooyin shaqo oo shakhsi ahaaneed. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato Tababaraha Shaqada muddo dheer ama muddo gaaban. Tababare Shaqo ayaa inta badan kugula kulmi doona goobta shaqada laakiin waxa laga yaabaa inuu kula kulmo bulshada dhexdeeda haddii ay taasi kugu habboon tahay oo aad ku qanacsan tahay.

Tusaalooyinka qaar ee sida uu kuu taageeri karo Tababaraha Shaqada ayaa ah:

- Inuu kaa caawiyo inaad barato xirfadaha looga baahan yahay shaqada
- Inuu kaa caawiyo inaad la shaqeyso kormeerayaasha iyo dadka kula shaqeeya
- Inuu kaa caawiyo inaad barato sida loo isticmaalo gaadiidka shaqada
- Inuu kaa caawiyo inaad ogaato waxa lagaa filayo shaqadaada
- Inuu ku siiyo kaalmo haddii ay shaqadu kugu adkaato ama haddii ay jiraan dhibaatooyin kale oo saameeya shaqadaada

Tababaraha shaqada ayaa la shaqayn doona loo shaqeeyaha si uu u dhiirigeliyo taageerada dabiiciga ah ee goobta shaqada. Taageerada dabiiciga ah waxaa guud ahaan bixiya shaqaale kula shaqeeya ama kormeere kor u qaada xiriirka latalinta. Taageerada dabiiciga ahi waxay sahashaa in si tartiib-tartiib ah loo dhimo taageerada tababaraha shaqada taas oo kor u qaadaysa socodka dabiiciga ah ee goobta shaqada kordhinaysana madax banaanida shaqaalaha.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Hadafka tababare kasta oo shaqo waa inuu kaa caawiyo inaad u madax-banaanaato shaqada. |
| Tababraha Shaqada ayaa kala shaqayn doona adiga iyo loo shaqeeyaha si loo dhimo/loo yareeyo taageerada tababarka shaqada marka ay haboon tahay. |

### Shaqaalaysiinta la Taageerayo

Shaqaalaysiinta la taageerayo waa shaqo bulshada dhexdeeda ah oo leh taageerooyin joogto ah (badanaa tababar shaqo) si ay kaaga caawiyaan inaad sii wadato shaqada. Waxaa loogu talagalay dadka, sabab la xiriirta naafo weyn, laga filayo inay u baahan yihiin taageerooyin ilaa inta ay sii shaqaynayaan. Qadarka taageerada aad heli lahayd maalin kasta ama toddobaad kasta waxay ku xirnaan doontaa baahidaada. DVR waxay ku bixin kartaa adeegyadan wakhti xaddidan oo keliya. Sabab la xiriirta in dadka ku jira shaqada la taageerayo ay u baahan doonaan taageerooyin wakhti dheer ah, waa in la qorsheeyaa cidda bixin doonta tababarka shaqada ama taageerooyinka kale kadib marka adeegyada DVR la dhammeeyo. Dhab ahaantii, sharcigu wuxuu farayaa in qorshayaashan la sameeyo ka hor inta uusan qof bilaabin shaqada la taageerayo.

Sidaa darteed, aad bay muhiim u tahay inaad la shaqeyso la-taliyahaaga si aad u codsato adeegyada kale ee laga yaabo inay diyaar u yihiin inay bixiyaan taageerada socota kadib marka adeegyada DVR la dhammeeyo. Tusaalooyinka agabyada laga yaabo inay diyaar u yihiin inay bixiyaan taageerooyinkan socda waa: taageerada dabiiciga ah ee loo shaqeeyaha; taageerada qoyska; Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha; Kharashyada Naafada La xidhiidha Shaqada ee Social Security; iyo Lacagaha Taageerada Dheeraadka ah ee DVR ee aasaasiga ah iyo dhaawaca Maskaxda.

## Marka yoolkaaga Shaqadu uu u baahan yahay Tababar

### Waa maxay Tababarka Shaqada?

Waa habka uu qofku ku baranayo xirfadaha looga baahan yahay inuu qabto shaqo gaar ah ama nooc shaqo. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah:

- Tababar xirfadeed
- Khibrad shaqo oo mushaar leh
- Tababarka shaqada gudaheeda
- Tababar xirfad gaar ah oo muddo gaaban ah
- layliyo shaqo
- Dugsi xirfadeed/farsamo
- Tababarka kuleejka

## DVR ma kaa caawin kartaa tababarka shaqada?

Haddii tababarka loo baahdo si aad u gaadho yoolkaaga shaqada, iyo haddii DVR ay ogolaatay inay kaa caawiso tan oo qayb ka mid ah qorshahaaga shakhsi ahaaneed ee shaqada ee la isku raacay, DVR waxa laga yaabaa inay kaa caawiso tababarka shaqada. Nooca tababbarka DVR waxay ku xidhan tahay kartidaada iyo danahaaga, macluumaadka ku saabsan suuqa shaqada iyo cilmi baadhis ku saabsan sida dadka badankiisu u galaan nooca shaqada aad rabto inaad qabato.

Dariiqooyinka Xirfaddu waa "tub-higsiyeedyo" kuwaas oo qeexaya waxbarashada iyo tababarka ay tahay in la dhammeeyo iyo shahaadooyinka ay tahay in la kasbado si loo gaaro yoolkaaga shaqo. VRC-gaaga ayaa kaa caawin doona sidii aad u samayn lahayd qorshe shaqo oo gaar ah ama "tub-higsiyeed" kaas oo tusinaya tillaabooyinka lagu gaadho yoolalkaaga. Talaabooyinkan waxaa lagu qeexi doonaa IPE-gaaga.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| VR kaliya waxay taageeri kartaa tababarka/waxbarashada machad la aqoonsan yahay. |

## Maxaa layga filayaa haddii DVR ay iga caawiso waxbarashada dugsiga sare kadib?

- Adiga iyo lataliyahaaga VR waa inaad ku heshishaan yoolkaaga shaqo iyo haddii tababar loo baahan yahay si loo gaaro
- Waxaad u baahan tahay inaad codsato oo lagu aqbalo gelitaanka barnaamijka tababarka ama dugsiga aad rabto inaad dhigato
- Haddii aad codsanayso kulliyad ama machad kale oo dugsiga sare ka dambeeya, waa in aad codsatid gargaar dhaqaale oo aad raacdo nidaamka dugsiga iyo jadwalka. Waxaad u baahan tahay inaad kala taliso DVR baahi kasta oo la xidhiidha naadada oo aad qabi doonto inta aad ku jirto barnaamijka
- Waa inaad ilaalisaa shuruudaha shaqo ee dugsiga ama barnaamijka si aad ugu sii jirto xaalad wanaagsan
- Waxaad u baahan tahay inaad kala hadasho lataliyahaaga VR ka hor isbedel kasta oo muhiim ah maadaama Qorshahaaga gaarka ah ee Shaqada uu u baahan karo in dib loo eego
- Waa inaad siisaa VR koobiyada buundooyinkaaga ama warbixinaha horumarka oo aad joogtaysaa xidhiidhka joogtada ah ee la taliyahaaga VR

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Waxaad codsan kartaa Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka (FAFSA) horaanta Oktoobar. |
| Haddii aad raadinayso hoy la xidhiidh xafiiska naafada ee dugsigaaga kahor inta aanu bilaabmin simistarka kasta. |

Fadlan tixraac "Baxnaaninta Xirfadda, Waxbarashada Dugsiga Sare kadib, Tababarka iyo Adiga: Hagaha Macmiilka" ee bogga 24.

*Shaqada adag ee "John" iyo taageerada VR ayaa isaga u diyaariyay waddo shaqo oo xiiso leh:*

*VRC ayaa aad ugu faraxsanaa inuu sheego in nin dhalinyaro ah oo naafo ah oo qaba Naafada Waxbarshada, oo ay wada shaqayn la samaynaysay, uu dhawaan ka qalin jabiyay kuleejka oo uu ka qaatay shahaadadada Cilmiga Bii'ada. Maqnaanshaha taageerada qoyska, adeegyada VR waxay ahaayeen kuwo muhiim u ah taageeridda isaga si uu u dhammaystiro waxbarashadiisa. Xitaa war ka sii wanaagsan, waxaa mar hore laga shaqaaleysiiyay shaqada xagaaga ee California asaga oo ah Farsamo yaqaanka Nooleyaasha Deegaanka!*

## Adeegyada Iskaa-u-Shaqeysiga

Iskaa u shaqeysiga waa nooc shaqo oo aad leedahay kaas oo aad ka shaqeyso ganacsigaaga. Waxa laga yaabaa inay tahay meherad aad kaga shaqeyso meel ka baxsan gurigaaga. Waxa kale oo lagu magacaabi karaa ganacsi yar ama shirkad ganacsi yar.

Haddii yoolkaaga shaqo sida ugu wanaagsan loogu gaadhi karo iskaa u shaqeysiga, DVR waxa laga yaabaa inay kaa caawiso samaynta ama joogteynta ganacsiga.

Adeegyada iskaa-u-shaqeysiga ee ay bixiso DVR waxay ku kooban yihiin adeegyada bilowga ah iyo badeecadaha. Tusaalooyinka waxaa ku jiri kara la-taliyayaal ganacsi, xisaabin, xayaysiis, kaydka bilowga ah, caymiska, oggolaanshaha, kirada, khidmadaha qalabka, kirada, adeegyada biyaha iyo tamarta, gaadiidka, telefoonka iyo boostada.

Guud ahaan, samaynta ganacsi kuu gaar ah waxay u baahan doontaa ballanqaad weyn oo wakhtigaaga iyo hantidaada si aad u guulaysato. Waaxda ayaa laga yaabaa inay kaa caawiso horumarinta iskaa u shaqeysiga ama ganacsi yar oo hoos imaanaaya shuruudaha soo socda.

Shuruudaha DVR ee qorshayaasha ganacsiga yaryar:

- Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad buuxiso xog-ururinta iskaa u shaqeysiga.
- Waa inaad samaysaa Qorshe Ganacsi waana inuu ogolaadaa lataliye ganacsi oo la ansixiyay, sida Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar ee Maine (SBDC), oo ah soo jeedin dhaqaale ahaan macquul ah. Ilaha ganacsiyada yaryar oo kale oo ay aqbali karaan adiga iyo lataliyahaaga VR ayaa laga yaabaa in la isticmaalo bedelkii SBDC. Haddii aad u baahan tahay kaalmo dheeraad ah, waxaa jira xarumo badan oo la-taliya Horumarinta Ganacsiga Yaryar oo bixiya la-talin joogto ah iyo aqoon-is-weydaarsiyo. Lataliyahaaga VR ayaa kaa caawin doona isku xirkan.
- Kahor bixinta adeegyada hoos yimaada Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqaalaysiinta iyadoo loo marayo yoolka iskaa u shaqeysiga, Waaxdu waa inay aqbashaa hadafka iyo qorshaha ganacsiga labadaba. DVR waxay caadi ahaan ku xaddidaysaa wax ay ku biirinayso samaynta ganacsi yar (marka laga reebo kharashka tababarka iyo naafanimada) ilaa $7,500 oo ay ku bixinayso ganacsiga taasoo kuu ogolaanaysa inaad gabi ahaanba isku filnaato ama ilaa $2,500 taasoo kuu ogolaanaysa inaad shaqeyso wakhti nus ah aadna sii wadato helida dheefaha sida SSI ama SSDI
- Waxaa lagaa filayaa inaad u raadsato maalgelin dibadda ah kharashyada bilowga ah ee ganacsigaaga, waana inaad ku darsato ganacsigaaga lacag caddaan ah, shaqaale quseeya, iyo/ama agab.
- Waxaa lagaa filayaa inaad lahaato oo aad maamusho ugu yaraan 51% ganacsiga
- Xasuusin Muhiim ah: Qorshayaasha iskaa-u-shaqeysiga ee laga filayo inay keenaan isku-filaansho (ka bixi karto dhammaan dheefaha dawladu bixiyo) waxay u baahan yihiin inaad haysato *rikoodhka dhanka amaahda oo wanaagsan*, ama hab aad si fiican ugu maareyso deyntaada

| Tilmaan Waxtar leh |
|---|
| Xasuusnoow in bilawga qorshaha iskaa u shaqeysiga uu wakhti qaadan doono in la horumariyo. |
| Riix halkan si aad u hesho Xarunta Horumarinta Ganacsiga Yaryar ee Maine. Ka raadi aqoon-is-weydaarsiyo iyo agabyo. |

## Marka ganacsiga yar uu shaqeynaayo:

La-taliyahaaga VR ayaa booqan doona goobta ganacsiga iyo/ama kula soo xiriiri doona si uu u arko sida ganacsigu u socdo. Kahor inta DVR aysan xirin kiiskaaga hay'adda, adiga iyo lataliyahaaga VR waxaad u baahan doontaan inaad go'aansataan inaad wali ku raacsan tahay in ganacsigu guulaysto ama uu guulaysan doono. Si lagaaga caawiyo inaad guulaysato, wakhtiga lagu taliyay ee lagula soconayo dadka qorshooyinka iskaa u shaqeysiga waa laba (2) sano.

| Tilmaan Waxtar leh |
|---|
| Kiiskaaga VR caadi ahaan waxa uu furnaan doonaa muddo dheer qaybta qorshaha iskaa u shaqeysiga. |

# Adeegyada Dhalinyarada ee DVR

## Qorshaynta kasoo wareegida dugsiga iyo guurista shaqada

Waax Baxnaaninta Xirfadda (DVR) waxay ogtahay muhiimada ay leedahay in goor hore la bilaabo sahaminta shaqada iyo diyaarinta. Waxaan siinaa ardayda, dhalinyarada iyo da'yarta qaangaarka ah fursadaha ay ku bartaan naftooda iyo waxa ay ku fiican yihiin iyadoo la dhisayo xirfaddo ka caawin doona inay galaan adduunka shaqada. VR waxa ay aaminsantahay in mid ka mid ah siyaabaha ugu wanaagsan ee ay dhalinyaradu ku baran karaan sida xirfadahooda iyo danahooda ay ula jaan qaadaan fursadaha shaqo ay tahay khibrad shaqo oo mushahar leh oo bulshooyinkooda dhexdeeda ah.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| Ilaa da'da 18 jir masuulka/waalidkaagu waxay u baahan doonaan inay saxiixaan dhammaan waraaqaha shaqada. |

## Adeegyada Kala-guurka ee Shaqada kahor

VR waxay siisaa Adeegyada Kala-guurka ee Kahor-Shaqada (Kahor ETS) ardayda naafada ah, da'doodu tahay 14-21 (fasalka 9[aad] iyo wixii ka sareeya) kuwaas oo codsaday lana xaqiijiyay inay u qalmaan adeegyada VR ama kuwa buuxiyay Foomka Diiwaangelinta Kahor ETS. Adeegyada kahor ETS waxaa ugu horayn la geeyaa kooxo dhalinyaro ah iyadoo lala kaashanayo dugsiyada iyo ururada kale waxaana loogu talagalay in lagu caawiyo ardayda naafada ah si ay ugu diyaar garoobaan waxbarashada dugsiga sare kadib iyo shaqada.

Adeegyada kahor ETS waxaa ka mid ah:

- La-talinta sahaminta shaqo
- Waayo-aragnimada waxbarasho ee shaqada ku salaysan, oo ay ku jiri karto dugsiga dhexdiisa ama fursadaha dugsiga kadib, khibrado ka baxsan goobta dugsiga caadiga ah, iyo/ama layliyo shaqo
- La-talinta fursadaha is-diiwaangelinta ku-meel-gaarka ah ama barnaamijyada waxbarashada dugsiga sare kadib
- Tababarka diyaargarowga goobta shaqada si loo horumariyo xirfadaha bulshada iyo nolol madax banaan
- Tilmaamaha u doodista naftaada

Haddii ardayga ama dhalinyarada naafada ah ay u baahan yihiin adeegyo kala guur oo shaqsiyeed oo dheeraad ah marka loo eego Adeegyada Kala-guurka ee Shaqada Kahor, markaas DVR waxay ku talinaysaa inay buuxiyaan codsiga adeegyada VR markay da'doodu tahay 16 ama laba sano kahor qalin-jabinta dugsiga sare ama ka bixitaanka.

| Tilmaan Waxtar leh |
| --- |
| VR waxay kaa caawin kartaa inaad bilowdo inaad ka fikirto shaqooyinka iyada oo loo marayo Aqoon Iswaydaarsiga Xirfadda Kala Guurka (TCEW), sahaminta Tubta iyo agabyo kale oo badan. |

## Waa maxay adeegyada ay bixiso VR?

Kadib marka la ogaado inay u qalmaan adeegyada VR, dhalinyarada iyo da'yarta qaangaarka ah ayaa sidoo kale laga yaabaa inay la shaqeeyaan la-taliyahooda VR si ay u horumariyaan Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqada (IPE). Lataliyahaaga VR waxaa laga yaabaa inuu:

- Ka qayb-qaato shirarka kooxda Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP), gaar ahaan marka diiradda kulanku yahay adeegyada kala-guurka. Qorshaynta kala-guurka waxay si fiican u shaqeysaa marka yoolalka iyo ujeedooyinka Qorshahaaga Shaqsi ahaaneed ee Shaqada (IPE) ee VR-kaaga ay taageeraan yoolalka dugsiga sare kadib ee IEP gaaga
- Baran kara adiga iyo qoyskaaga si uu u fahmo sida aad ula shaqayn karto VR kahor iyo kadib qalinjabinta
- Kula tashto adiga, qoyskaaga iyo shaqaalaha dugsiga si ay kaaga caawiyaan inaad doorato koorsooyinka dugsiga oo kaa caawin doona inaad gaarto yoolalkaaga dugsiga kadib iyo sidoo kale kor u qaadida fursadaha khibradaha shaqo inta aad weli ku jirto dugsiga

- Adiga iyo qoyskaagaba ka caawin kara sidii aad u baran lahaydeen, qorshayn lahaydeen oo aad u heli lahaydeen barnaamijyada adeega dadka waaweyn ee shaqada la xidhiidha
- Kugu martiqaado inaad ka qaybgasho manhajka Tabobarka Sahminta Xirfadda Kala-guurka si uu kaaga caawiyo inaad wax badan ka ogaato meelaha aad ku fiican tahay iyo xirfadahaaga
- Waxay ku siinayaan Adeegyada Hagidda Dadka isku xaalada ah si ay kaaga caawiyaan inaad u diyaargarowdo shaqadaada koowaad ama waxbarashadaada dugsiga sare kadib
- Inuu sahamiyo aqoonta dhaqaalaha, la-talinta faa'iidooyinka, tababarka tignoolajiyada iyo baahiyaha kale
- Inuu diyaariyo waraysiyo xog-waraysi ah, tusaalayn shaqo, iyo khibrad shaqo oo mushaar leh oo bulshada dhexdeeda ah

Tilmaan Waxtar leh

Si firfircoon ula shaqeynta VRC-gaaga waxay kaa caawin doontaa inaad sahamiso fursadaha dookhyada shaqo ee hadda iyo mustaqbalka.

Riix halkan si aad u hesho Hagaha Adeegyada Kala-guurka ee Maine oo Aad u hesho Waddadaada Shaqo

Halkan ku dhufo si aad u hesho Hagaha Aqoonta Maaliyadda

*"Sandy" waxay la kulantay natiijo lama filaan ah oo ku saabsan ka qaybgalka safar shaqo:*

*Sandy" waxa ay ku biirtay socdaal kooxeed xarun sare oo deegaanka ah oo ku taal Lewiston. Socdaalkani wuxuu horseeday fursad lagu wareysto taasoo keentay shaqo yabooh! Aad ayay ugu faraxsan tahay in ay bilawdo booskeeda cusub ee kaaliyaha nafaqada.*

## Horusocod Shaqo

Kadib markii la ogaado inay u qalmaan adeegyada Baxnaaninta Xirfadda, dhalinyarada iyo qoysaskooda waxay kala hadlaan lataliyaha VR ee loo xilsaaray haddii Shaqada Horusocodka leh tahay habka saxda ah. Dhallinyarada loo gudbiyo Shaqada Horusocodka leh waxay heli karaan koox dhallinyaro ah oo xirfadlayaal ah oo la wadaaga aqoontooda oo fikrado ku abuura kulammada shaqaalaha ee joogtada ah- taasoo horseedda fursado la ballaariyay!

Fursadaha waxqabadyada gacanta lagu hayo ee bulshada waxaa ka mid ah:

- Kormeer Shaqo
- Wareysiyo
- Tusmooyinka Shaqada
- Waaya-aragnimada Shaqada/Waaya-aragnimada Shaqada xagaaga
- Tababarka Gudaha Shaqada

Tilmaan Waxtar leh

Shaqo Horusocod leh waxay kuu sahlaysaa inaad ka qayb qaadato fursadaha xirfadeed markaad diyaar u tahay!

Riix halkan si aad u daawato higsiyada Shaqo Horusocod leh ee Mitchell iyo Gabby

*Shaqada Horusocodka leh waxay ka taageertay "John" inuu si tartiib ah u galo hawlaha shaqo oo ku haboon heerkiisa:*

*"John", oo nin dhalinyaro ah oo qaba Ootiisam ayaa ka qalin jabiyay dugsiga sare sannadkii hore isagoo xiisaynaya adeegga cuntada. John qoyskiisu aad bay uga cago jiideen inay u oggolaadaan inuu meel kasta u tago si madax-bannaan, bixiyeyaasha la shaqeeyana waxay la yaabeen sida ay tani u saamaynayso helitaankiisa shaqo. John waxaa loo gudbiyay qaabka Shaqada Horusocoka leh ee DVR wuxuuna bilaabay inuu la shaqeeyo Lataliye Xirfadeed. La-taliyaha Xirfaddu aad buu ugu tartiibiyay muddo kadibna wuxuu helay kalsoonida macmiilka iyo qoyskiisa. Dhaqdhaqaaqyo dhowr ah kadib, John waxaa laga shaqaaleysiiyay makhaayad maxalli ah oo samaynaysa diyaarinta cuntada oo hadda waxa uu baranayaa in uu maamulo diiwaanka sidoo kale. Waa shaqaale aad loo jecel yahay oo la qiimeeyo. Waxaa kale oo xiiso badan leh, wuxuu sidoo kale hadda u raacayaa baska si madaxbannaan si uu u tago shaqada!*

## Tignoolajiyada Baxnaaninta/Tignooloojiyada Kaalmaatiga ah

Tignoolajiyada Baxnaaninta, oo mararka qaarkood loo yaqaan Tignoolajiyada Kaalmaatiga ah, waa qiimaynta iyo adeegsiga aaladaha caawiya shakhsiyaadka naafada ah si ay u ilaashadaan ama u wanaajiyaan awooddooda ay u shaqeynta si madaxbannaan. Tignoolajiyada Baxnaaninta sidoo kale waxa ku jira adeeg kasta oo loo baahan yahay si loo tijaabiyo, loo tijaabiyo, ama loo barto isticmaalka aaladaha. Baxnaaninta xirfadda, Tignoolajiyada Baxnaaninta waxaa loo isticmaalaa ujeeddada lagu caawinayo shakhsiyaadka inay si madaxbannaan u shaqeeyaan ama si madax-bannaan uga qaybqaataan Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee Shaqo-siinta taasoo horseedaysa shaqo tartan leh.

Waxaa jira noocyo badan oo kala duwan oo ah aaladaha tignoolajiyada. Qaarkood waa kuwo sahlan yihiin oo fudud sida furayaasha, hagaha qoraalka ee xaashida, far weyneeya, ama kiiboodhka la habeeyey. Kuwo kale ayaa aad u adag waxaana laga yaabaa inay u baahdaan tababar si loo isticmaalo. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah kombuyuutar leh software-ka aqoonsiga codka, kursiga curyaanka ee awoodda leh ama mootada, qalabyada farsamaysan iyo lafaha (lugaha macmalka ah, biraha), qalabka gargaarka maqalka iyo qalabka kale ee isgaarsiinta, iyo wax ka beddelka baabuurta.

Lataliyahaaga VR ayaa kula shaqayn doona si uu u go'aamiyo inaad u baahan tahay qalab ama adeegyo Tignoolajiyada Baxnaaninta. Qiimaynta khabiirka tignoolajiyada (khabiir ka baxsan DVR) ayaa laga yaabaa in lagu siiyo si ay kaaga caawiso inaad barato tignoolajiyada la heli karo iyo sida ay u wanaajin karto shaqadaada markaad ka fikirto qorshayaashaada shaqo iyo yoolalkaaga ama sida shaqooyinka gaarka ah loo waafajin karo.

| |
|---|
| Tilmaan Waxtar leh<br>Haddii aad hore ula shaqaynaysay xirfadle u qalma, u keen dukumeentiga VRC-kaaga.<br>Tignoolajiyada caawinta waa mid gaar ah waxayna ku kala duwanaan doontaa iyadoo ku saleysan IPE-gaaga. |

### Waa maxay Habka lagu Helo Adeegyada Tignoolajiyada Baxnaaninta?

1. Adiga iyo lataliyahaaga VR waxa aad ku heshiin kartaan aaladaha fudud kuwaas oo, inta badan, si degdeg ah oo fudud loo iibsan karo.
2. Marka adiga iyo la-taliyahaaga VR aad go'aansataan inaad u baahan tihiin la-talinta Tignoolajiyada Baxnaaninta, La-taliyahaaga VR ayaa kuu gudbin doona khabiir dhinaca tignoolajiyada ah. Qabanqaabada waxa loo samayn doonaa khabiirka tignoolajiyada si uu kugu qiimeeyo gurigaaga, dugsigaaga ama goobtaada shaqo.
3. Inta lagu jiro kulanka, khabiirka tignoolajiyada ayaa kaala hadli doona baahiyahaaga gaarka ah iyo yoolalka shaqada waxaana laga yaabaa inay ku weydiiyaan inaad qabato hawlo si loo go'aamiyo heerkaaga shaqo. Kulanka kadib, khabiirka tignoolajiyada ayaa warbixin u qori doona lataliyahaaga VR isaga oo qeexaya natiijooyinkiisa iyo talooyinka.
4. Lataliyahaaga VR ayaa kula wadaagi doona warbixinta waxaadna heli doontaa fursad aad ku waydiiso su'aalo kasta oo aad ka qabto warbixinta. Marka adiga iyo la-taliyahaaga VR aad ogolataan in talooyinka ay lagama maarmaan u yihiin Qorshahaaga Gaarka ah ee Shaqada si uu u guuleysto, waxaa la diyaarin doonaa si aad u soo iibsato qalabka ama diyaarinta adeegga. Muddada ay qaadanayso helitaanka qalabka waxay ku xirantahay nooca tignoolajiyada, helitaanka iyo habka iibka.
5. Kaalmaatiga iyo Aaladaha la habeeyey ee si gaar ah loogu farsameeyay si ay kuugu habboonaadaan waxay qaadan doontaa wakhti dheeraad ah.
6. DVR waxa ay ku dadaali doontaa in ay waafajiso waxa aad door bidayso inta ay raacayso siyaasadaha wax iibsiga ee Gobolka. Haddii aad leedahay alaab ama iibiye aad door bidayso, waa inaad hubisaa inaad ogeysiiso la-taliyahaaga.

Xaaladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad u baahato tababar si aad u barato sida loo isticmaalo qalabka. Adiga iyo lataliyahaaga VR ayaa kuu diyaarin kara inaad barato sida loo isticmaalo qalabka markaad hesho qalabka. Waxay noqon doontaa mas'uuliyaddaada inaad la shaqeyso tababarka, muraajacayso, iyo inaad dhammaystirto dhammaan shaqooyinka.

### Barnaamijka Amaahda Qalabka La Qabsiga (AELP)

Iyada oo loo marayo barnaamijka dammaanadda ee uu maalgeliyo gobolka, shakhsiyaadka iyo ganacsiyadu waxay heli karaan deymo dulsaar hooseeya laga bilaabo $250 ilaa $100,000 si ay awood ugu yeeshaan helitaanka tignoolajiyada caawinta ama si loo horumariyo gelitaanka guriga ama shaqada.

Shakhsigu wuu geli karaa barnaamijka si uu u helo alaab ay ka mid yihiin:

- Baabuur ama Caasiyaal leh kontaroolada gacanta iyo wiishashka
- Shaawarka Gaari Curyaanka lagu galo
- Aaladaha caawiya maqalka
- Aaladaha Kordhinta Isgaarsiinta
- Aaladaha Isgaarsiinta ee Dhegoolayaasha- TTY
- Kumbuyuutarrada kor u hadla
- Wiishashka iyo Rakada Kursiga Curyaanka
- Waxka bedelka Guriga
- Qalabka madadaalada (wareegga gacanta, kuraasta curyaanka ee isboortiga)

Ganacsiyadu waxay heli karaan agabka si ay u helaan alaab ay ka mid yihiin:

- Wiishyada iyo Jaranjarooyinka Socda
- Wax ka bedelka Dhismaha (Albaabada, Musqulaha, meelaha la wadaago)
- Laqabsiga Goobta Shaqada ee Shaqaalaha
- Gawaarida Naafadu Geli Karto

Barnaamijkan waxaa maamula Alpha One.

Si aad u hesho Macluumaad Dheeraad ah booqo: Barnaamijka Amaahda Qalabka La Qabsiga | Alpha One

## Adeegyada kale ee laga heli karo Baxnaaninta Xirfadda:

### Waaxda Dhagoolayaasha, Dadka Dhagaha Culus, iyo Dadka Maqalkoodu gadaal ka xumaaday

Qaybta Dhagoolayaasha, Maqalka Adag iyo kuwa Dhago La'aan waa qayb ka mid ah Qaybta Baxnaaninta Xirfadda waxayna siisaa barnaamij adeeg dadka dhegaha la', maqal adag, iyo kuwa dhego la'. Marka laga soo tago adeegyada VR, qaybtu waxay sidoo kale bixisaa adeegyo sida: daabacaadda Hagaha Kheyraadka, Khadadka Maine ee Dhegoolayaasha (wargeys), qalab isgaarsiineed oo socda iyo barnaamijyo kale oo tababar oo loogu talagalay wakaaladaha gobolka, macluumaadka iyo gudbinta, u doodista, dhiirigelinta helitaanka, Kaararka Aqoonsiga Dhegooleyaasha iyo liiska turjubaannada sharciga ah ee aqoonta leh.

Wixii macluumaad dheeraad ah la xidhiidh ama booqo websaydka DDHHLD

Waaxda Dhagoolayaasha, Dadka Dhagaha Culus, iyo Dadka Maqalkoodu gadaal ka xumaaday
45 Commerce Drive
150 State House Station
Augusta, Maine 04333
Taleefanka muuqaalka 207-470-7668
TTY 207-623-7957

Tilmaan Waxtar leh

Waxaa jira La Taliyaasha Baxnaaninta oo ka shaqeeya Waaxda Dhegoolayaasha, Dadka Maqalka Culus iyo kuwa Dhago-daahsan ee dhammaan Gobolka oo dhan

### Adeegyada Nolosha ee Madaxa banaan

### Waa maxay Barnaamijka Adeegyada Nolosha ee Madaxa banaan?

DVR waxay heshaa lacagaha dawlada dhexe ee loogu talagalay Barnaamijka Adeegyada Nolosha ee Madaxa banaan waxayna qandaraas ku bixisaa bixinta adeegyada. DVR waxay hadda heshiis la gashay Alpha One, Xarunta Maine ee Nolosha Madaxa banaan. Barnaamijka Adeegyada Nolosha ee Madaxa banaan (ILS) wuxuu caawiyaa dadka naafada ah si ay si madax-banaan ugu noolaadaan guryahooda iyo bulshooyinkooda. Barnaamijku wuxuu bixiyaa oo habeeyaa adeegyada IL ee loo baahan yahay iyadoo ku xiran helitaanka lacag. Barnaamijku sidoo kale waa barnaamij u dooda dadka naafada ah iyo qoysaskooda.
Wixii macluumaad dheeraad ah iyo si aad u codsato Barnaamijka ILS, la xidhiidh xafiiska Alpha One ee kuugu dhow:

**Alpha One, South Portland**
127 Main Street
South Portland, ME 04106
(207) 767-2159- Cod
(800) 640-7200 Cod
(207) 799-8346 Fakiska

**Alpha One, Bangor**
11 Bangor Mall Blvd.
Bangor, ME 04401
(207) 941-6553
(800) 300-6016
(207) 941-6410

**Alpha One, Presque Isle**
551 Main St.
Presque Isle, ME 04769
(207) 764-6466 Cod
(800) 974-6466 Cod
(207) 764-5396 Fakiska

## Khayraadka:

## Sideen u sameeyaa doorasho shaqo oo wanaagsan?

Doorashada xirfaddu waxay ku lug leedahay is waafajinta kartidaada, xiisahaaga, qiyamkaaga iyo shakhsiyaddaada iyo baahida shaqada adduunka dhabta ah. Tani waa nidaam firfircoon oo ka kooban waxqabadyo loogu talagalay inay kaa caawiyaan inaad doorato hadaf shaqo. Lataliyahaaga VR ayaa diyaar u ah inuu kaa caawiyo habkan.

**Afar tilaabo oo lagu Dooranayo Xirfad**:

**1.Ogaanshaha naftaada:**

Nidaamku wuxuu ku bilaabmayaa sahan faahfaahsan oo naftaada ah. Maxaa ku dhiirigeliya? Waa maxay danahaagu? maxaad ku fiican tahay? Waa maxay shakhsiyaddaadu? Maxay yihiin arrimaha la xidhiidha naafanimada ee saameeya doorashadaada shaqo? Xagee rabtaa inaad ku noolaato oo aad ka shaqeyso? Tan waxaa lagu sameyn karaa siyaabo kala duwan, oo ay ku jiraan is-qiimeyn, wareysiyo la-talin qoto-dheer oo lala yeesho la-taliyahaaga VR, imtixaannada xiisaha ama kartida, hadhka shaqada iyo kooxaha shaqada.

Iyadoo qayb ka ah nidaamkan, lataliyahaagu waxa laga yaabaa inuu kuu gudbiyo Aqoon-is-weydaarsiga Sahminta Shaqada (CEW) kaas oo lagu qabto CareerCenter oo ay fududeeyaan shaqaalaha DVR. Aqoon-is-weydaarsigu wuxuu daboolayaa meelaha ay ka midka yihiin waxyaabaha laga filayo shaqada, u diyaargarowgaaga qalabka shaqada si loo qiimeeyo danahaaga iyo xirfadahaaga, aaladaha shaqo lagu helo, iyo la shaqaynta la-taliyahaaga VR.

**2.Ururinta macluumaadka shaqada iyo waxbarashada**:

Sababtoo ah macluumaadka shaqada iyo waxbarashada ayaa mar walba isbedelaya, waxaa muhiim ah inaad ururiso macluumaadka ku saabsan adduunka shaqada oo aad go'aamiso meesha ugu habboon. Lataliyahaaga VR ayaa kaa caawin kara habkan. Waxa jira tiro agab ah oo aad heli karto macluumaadka shaqada ee Waaxda Maine ee CareerCenter iyo interneedka. Waxa kale oo jira dhaqdhaqaaqyo xirfadeed oo laga yaabo inay kaa caawiyaan tallaabadan sida inaad booqato goobta shaqada iyo inaad u kuur gasho dadka qabanaya shaqada aad xiisaynayso ama isku day inaad naftaada tijaabiso shaqada muddo gaaban. Intaa waxaa dheer, la hadalka loo-shaqeeyayaasha ama dadka kale ee goobta aad xiisaynayso waa hab aad u wanaagsan oo aad wax badan uga baran karto shaqada (yada) aad ka fikirayso.

La-taliyahaaga VR waxa kale oo laga yaabaa in macluumaadkan qaar ka mid ah uu ku helo la-hadalka loo-shaqeeyayaasha. Inta badan ee macluumaadka noocan ah aad ururin karto, ayaa go'aankaaga xirfadeed ay u badan tahay inuu fiicnaado. Markaad abuurayso Qorshahaaga gaarka ah ee Shaqada, waxay noqon doontaa mid waxtar leh inaad la wadaagto mid kasta oo ka mid ah macluumaadka aad soo ururisay lataliyahaaga VR.

Qiimaynta Xaaladda- Haddii aanad garanayn nooca shaqada aad rabto inaad qabato, ama haddii la-taliyahaaga VR aanu hubin sida VR kuu caawin karo, la-taliyahaagu waxa laga yaabaa inuu marka hore kuu dejiyo khibrad shaqo oo mushahar leh.

Haddii danahaaga shaqadu ay u baahan yihiin waxbarasho rasmi ah iyo tababar, ayna jiraan su'aalo ku saabsan ku habboonaanta tababarkan, lataliyahaagu waxa laga yaabaa inuu sameeyo qiimayn waxbarasho oo tijaabo ah. Tani waa meesha aad ka heli karto fursad aad ku tijaabiso tababar xaddidan oo qayb ka ah qiimeyntaada.

**3.Go'aan gaarista shaqada iyo helitaanka shaqo kugu haboon:**

Marka aad soo marto habraac wanaagsan oo is-qiimeyn ah oo aad dhammeysato marxaladda macluumaadka shaqada, waxaad diyaar u tahay inaad qaadato go'aan sax ah oo ku saabsan is waafajinta xirfadahaaga, kartidaada, qiyamkaaga iyo shakhsiyaddaada iyo shuruudaha shaqada aad dooratay. Adiga iyo lataliyahaagu waxa aad go'aamin kartaan in nooca shaqadu adiga kugu habboon tahay, wax aad karti u leedahay oo aad ku raaxaysato samaynta. Macluumaadka la ururiyey waxaa loo isticmaali doonaa shaqo kasta oo kale oo adiga iyo VR wada qabataan. Intaa waxaa dheer, La-taliyahaaga VR ayaa kaa caawin kara inaad qiimeyso baahiyaha jireed ama maskaxeed ee loo baahan yahay iyo dejinta macquulka ah ee aad u baahan karto si aad u guulaysato.

**4.Qorshaynta hab hawleed:**

Dejinta Qorshaha Shakhsi ahaaneed ee DVR ee Shaqaalaysiinta oo leh yool shaqo oo diirada lagu saarayo kaas oo faahfaahinaya adeegyada iyo taageerada aad u baahan doonto si aad u gaadho yoolkaaga waa hal dariiqo oo wanaagsan oo aad qorshayso koorsada ficilka. Lataliyahaaga VR ayaa diyaar u ah inuu kaa caawiyo sameynta qorshahan.

# Baxnaaninta Xirfadda, Waxbarashada Dugsiga Sare kadib, Tababarka iyo Adiga: Hagaha Macmiilka

**Hordhac**

Ujeedada qaybtan buug-gacmeedku waa inay kaa caawiso inaad fahamto sida ay u shaqeeyaan Baxnaaninta Xirfadaha (VR) iyo Waxbarashada Dugsiga Sare kadib iyo in la sharaxo dhammaan doorarka iyo mas'uuliyadaha shakhsiyaadka ku lug leh habka.

Macluumaadkani waxa uu khuseeyaa barnaamijyada tababarka, waxbarashada iyo farsamada labadaba, kuwaas oo u qalma kana qayb qaata Barnaamijka Gargaarka Ardayga ee Federalka. Foomka Macluumaadka Kaalmada Dhaqaale ayaa loo isticmaali doonaa si loo ogaado kharashyadaada, agabyadaada iyo wax ku biirinta VR ee barnaamijkaaga.

In kasta oo aan isku daynay inaan ogaanno arrimaha muhiimka ah iyo walaacyada, waxaan ognahay inaad su'aalo qabi doonto. Fadlan la xidhiidh la-taliyahaaga VR marka ay tani dhacdo. Xusuusnow in qorshaynta wanaagsan iyo xidhiidhka soo noqnoqda iyo furfurnaanta ee dhammaan ciyaartoydu ay tahay furaha guusha aaggan.

**Sharcigu Muxuu Yiri?**

Sharciyada federaalka iyo qawaaniinta Maine VR waxay SHEEGAYAAN haddii waxbarashada dugsiga sare ka dambeysa loo baahdo si aad u gaarto yool shaqo (xirfad), VR waxaa laga yaabaa inay ku caawiso. Taageerada VR ee waxbarashada dugsiga sare kadib lama bixin karo ilaa aad samayso dadaalka ugu badan si aad u hesho kaalmo ilo kale, oo ay ku jirto kaalmada ardayda federaalka.

**FAFSA:**

Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka (FAFSA) waa foom ay buuxiyeen ardayda hadda iyo kuwa mustaqbalka leh ee kulleejyada ah (shahaadada koowaad ee jaamacadda iyo qalin jabinta) ee gudaha Mareykanka si loo go'aamiyo u-qalmitaanka kaalmada dhaqaale ee ardayga. Dhammaan ardayda isticmaalaya adeegyada VR, waxay u baahan yihiin inay buuxiyaan foomkan. FAFSA ayaa go'aamin doonta nooca gargaarka maaliyadeed ee aad heli doonto.

**Waa maxay Kaalmada Dhaqaale?**

Kaalmada maaliyadeed waxaa loogu talagalay in lagu caawiyo shakhsiyaadka inay daboolaan kharashaadkooda waxbarasho marka agabkooda aysan ku filnayn. Ardayga aaminsan in agabkiisa iyo kuwa qoyskiisu aanay ku filnayn inuu iska bixiyo dhammaan kharashyada imaanshaha (waxbarashada, qolka iyo boodhka, buugaagta, gaadiidka, hawlaha kambaska, iwm.) waa in uu ka codsadaa gargaar dhaqaale iyada oo loo marayo Xafiiska Gargaarka Dhaqaalaha (FAO) ee machadka uu isagu/iyada qorsheynayo inuu ku biiro. Saddex nooc oo gargaar ah ayaa diyaar ah.

- Deeqaha – hadiyado iyo deeqo waxbarasho, kuwaas oo aan qasab ahayn in dib loo bixiyo.
- Amaah – lacag la soo amaahday si loogu daboolo kharashaadka dugsiga. Waa in lagu bixiyaa, inta badan iyadoo dulsaar leh, muddo cayiman. Tani waxay badanaa dhacdaa marka ardaygu ka tago dugsiga ama uu dhammeeyo.
- Barashada Shaqada – shaqo, taaso u suurtagelisa ardaygu inuu kasbado qayb ka mid ah kharashka dugsiga.

**Waa maxay Qaybta Laga doonaayo inuu bixiyo Qoysku**?

Haddii aadan helin SSI/SSDI ama aad u qalanto 1619b waxaa lagaa filayaa inaad bixiso Qaybta Laga doonaayo inuu bixiyo Qoysku (EFC)

EFC waa lambar tilmaame ah oo ay kuleejyadu isticmaalaan si ay u go'aamiyaan inta kaalmo lacageed ee aad xaq u leedahay in aad hesho. EFC-kaaga waxaa loo xisaabiyaa si waafaqsan qaacido sharcigu dejiyay iyo macluumaadka ka yimid [Codsigaaga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga ee Federalka (FAFSA)].

EFC-du waxay qayb ka tahay dakhliga, hantida iyo dheefaha la canshuuro iyo kuwa aan la canshuurin ee qoyskaaga (sida gunnooyinka shaqo la'aanta ama Social Security). Tirada qoyskaaga iyo tirada xubnaha qoyska ee aadi doona kulliyadda inta lagu jiro sannadka ayaa sidoo kale la tixgaliyay.

**Miyaa La Iiga Baahan Yahay Inaan Amaah Qaato?**

Waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad amaah ku qaadato waxbarashadaada laakiin tani maaha mid sharciga federaal ama gobolku kaa rabo. Si kastaba ha ahaatee, dadka intooda badani waxay gartaan in amaahdu ay tahay qayb lagama maarmaan ah oo ka mid ah ka qayb galka barnaamijka waxbarashada dugsiga sare kadib. U fahan

deymaha inay yihiin maalgashi mustaqbalkaaga ah. Sidoo kale, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad ka fikirto qaadashada deyn si aad u daboosho kharashyada nolosha aasaasiga ah.

Haddii aad ka baaqsatay deyn arday hore, ma awoodi doontid inaad hesho deeqo, deyn arday oo dheeraad ah ama kaalmada waxbarashada shaqada. Waxaad u baahan doontaa inaad muujiso inaad samaysay dadaal macquul ah si aad u bixiso daymahaaga ka hor intaysan VR ka fikirin beddelka abaalmarin kasta oo deeq ah. Sidii hore loo sheegay, taageerada VR ee tababarka dugsiga sare kadib lama bixin karo ilaa aad samayso dadaalka ugu badan si aad uga hesho caawimo ilo kale.

**Sida Baxnaaninta Xirfaddu ay ugu habboon tahay habka gargaarka maaliyadeed:**

Marka waxbarashada dugsiga sare kadib loo aqoonsado adeeg waxaad u baahan tahay si aad u gaadho yoolkaaga shaqo, isku dubaridan, dadaal badan oo talaabooyin ah oo adiga kugu lug leh, DVR iyo xafiiska kaalmada maaliyadeed ee dugsiga ayaa bilaabmaya.

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad buuxiso qayb ka mid ah foomka beddelka Kaalmada Maaliyadeed ee VR. Foomkan waxa isweydaarsanaya adiga, DVR iyo Xafiiska Kaalmada Maaliyadeed ee dugsiga. Waxaa loo isticmaalaa in lagu xaqiijiyo kaalmada dhaqaale ee ay FAFSA iyo dugsigu ku siiyeen oo lagu caddeeyo kharashka imaanshaha.

DVR waxay u isticmaali doontaa macluumaadkan si ay u go'aamiso qiimaha dhabta ah ee imaanshahaaga oo ay ku jiraan kharashyada la xidhiidha naafanimada. La-taliyahaaga VR ayaa xisaabin doona kaalmada maaliyadeed ee la bixiyo marka laga reebo kharashka imaanshaha. Tiradan waxaa loo yaqaan "Baahida aan la Daboolin". Baahida aan la daboolin ayaa ah qayb VR ay gacan ka geysan doonto kharashka waxbarashadaada. Ardayda hesha SSI/SSDI, dhammaan baahidaada aan la daboolin waa in ay daboosho DVR.

**Waa maxay kharashyada waxbarashada loo arko inay la xidhiidha naafo?**

Ardayga naafada ah ayaa inta badan la kulma kharashyo dheeraad ah oo aanay galin ardayda kale. Tusaalooyinka kharashyadan waxaa ka mid ah:

- Iibka iyo dayactirka qalabka la xidhiidha naafada
- Kharashka adeegyada isticmaalka shakhsi ahaaneed ama daraasadda sida qalabka akhriska, ama adeegayaasha daryeelka shakhsi ahaaneed
- Gaadiidka lagama maarmaanka u ah in lagu sii wado barnaamijka tacliinta, haddii gaadiid caadi ah aan la heli karin
- Kharashyada caafimaadka ee si toos ah ula xidhiidha naafanimada qofka ee aan caymisku daboolin
- Biilasha cuntada iyo caafimaadka xoolaha ee eeyaha haga
- baytariyada aalada maqalka iyo aaladaha isgaadhsiinta ee dhagoolaha
- Kharashyada qorista iyo tababarka akhristayaasha ama adeegayaasha daryeelka shakhsi ahaaneed

Inta badan, ka tagista guriga waxay u baahan tahay iibsashada qalab cusub ama dheeraad ah oo u oggolaanaya ardaygu inuu u madax-bannaanaado dugsiga. Qaar ka mid ah qalabka iyo adeegyada taageerada ayaa laga yaabaa in laga helo machadka dugsiga sare kadib. Adiga iyo lataliyahaaga VR waa inaad ka hubsataan Iskuduwaha 504 ama Xafiiska Adeegyada Taageerada Naafada ee xarunta si aad u aragto waxa halkaas ka jira.

**Waa maxay Mas'uuliyaddaha i Saaran?**

Dhigashada waxbarashada dugsiga sare kadib waxa ay xambaarsan tahay mas'uuliyado kala duwan. Kuwaan waxaa kamid ah:

- Codsashada iyo buuxinta macluumaadka Kaalmada Maaliyadda waqti ku habboon
- Sahaminta ilaha kale ee maalgelinta kuwaas oo kaa caawin kara qaar ka mid ah kharashyada dugsiga sare kadib. Tusaalooyinka kheyraadkan waxaa ka mid ah Qorshaha Lagu Gaarayo Taageerada Iskaa ah (PASS), Ticket to Work, ASPIRE, VA iyo Xarunta Horumarinta Shaqaalaha
- Hayso ugu yaraan lix saacadood oo buundooyin ah simistar kasta taasoo muujinaysa horumarka waxbarasho
- Joogtee heer tacliineed oo wanaagsan oo aad la leedahay machadka
- Sii la taliyahaaga koobiga buundooyinkaaga si joogto ah.
- La kulan waaxda adeegyada naafada si ay u diyaariso hoy kasta oo aad u baahan tahay

- Waxaa lagaa doonayaa inaad u sheegto la-taliyahaaga VR wixii isbeddel ah ee ku yimaadda xaaladdaada, tusaale shaqo wakhti buuxa ilaa waqti nus ah, iyo wixii dhibaato ah ee aad kala kulmeyso xarunta

**Goobaha Macluumaad Dheeraad ah:**

La-taliyahaaga VR iyo FAO waa inay awoodaan inay ka jawaabaan su'aalaha aad qabto. Waa kuwan meelaha qaar ee aad ka helayso macluumaad dheeraad ah

1.Wbeseedka Kaalmada Ardayga ee Federaalku waxa uu leeyahay agabyo badan waxana uu daabacaa buug yar oo la yiraahdo ”Funding Education Beyond High School (Maal Gelinta Waxbarashada Kadib Dugsiga Sare)” kaas oo laga heli karo https://files.eric.ed.gov/fulltext/ED490979.pdf

2.Maamulka Maaliyadda ee Maine (FAME) waa barnaamij laga yaabo inuu kheyraad u noqdo ardayda raba inay sii wataan waxbarashadooda. Wixii macluumaad dheeraad ah:

Finance Authority of Maine (FAME)

5 Community Drive, P.O. Box 949
Augusta, ME 04332-0949
TALEEFANKA: (207) 623-3263 ama 1-800-228-3734

- TTY: (207) 626-2717

FAKISKA: (207) 623-0095

http://www.famemaine.com/

3.Barnaamijka Kaalmada Macmiil (Client Assistance Program) (CAP) waa barnaamij u doode oo ay maalgaliso dawladda dhexe kaas oo bixin kara macluumaadka iyo, haddii loo baahdo, matalaadda macaamiisha/codsadaha VR. Wixii macluumaad dheeraad ah ka eeg bogga 12 ee buug-gacmeedkan

Kaalmada maaliyadeed waxay ku salaysan tahay iskaashiga u dhexeeya ardayga, waalidiinta, machadyada dugsiga sare ka dambeeya, dawladda federaalka iyo wakaaladaha sida VR. Habka gargaarka maaliyadeed wuxuu noqon karaa mid adag oo waqti badan qaata. Waxay u baahan tahay isuduwidda, iskaashiga iyo xiriirka ka dhexeeya FAO, La-taliyaha VR iyo adiga.

### Waaxda Xafiisyada Baxnaaninta Xirfadda

Augusta
45 Commerce Drive
Augusta, ME 04330-0073
624-5120 ama 1-800-760-1573
TTY Fadlan adeegso Relay 711
287-6249 (fakiska)

Bangor
45 Oak Street, Suite 1
Bangor, ME 04401-6589
561-4000 ama 1-888-545-8811
TTY Fadlan adeegso Relay 711
561-4027 (Fakiska)

Hinckley
23 Stanley Rd
Hinckley, ME 04944
474-4958 ama 1-800-760-1572
TTY Fadlan adeegso relay 711
453-2501 (Fakiska)

Houlton
11 High St.
Houlton, ME 04730-2421
532-5019 ama 1-800-432-7338
TTY Fadlan adeegso Relay 711
532-7995 (Fakiska)

Lewiston
5 Mollison Way
Lewiston, ME 04240-5805
753-9000 ama 1-800-741-2991
TTY Fadlan adeegso Relay 711
753-9051 (Fakiska)

Machias
53 Prescott Drive, Suite 2
Machias, ME 04654-9751
255-1926 ama 1-800-770-7774
TTY Fadlan adeegso Relay 711
255-1926 (Fakiska)

Portland
151 Jetport Blvd.
Portland, ME 04102
822-3300 ama 1-877-594-5627
TTY fadlan adeegso Relay 711
775-7870 (Fakiska)

Presque Isle
66 Spruce Street, Suite 3
Presque Isle, ME 04769
760-6300 ama 1-800-635-0357
TTY fadlan adeegso Relay 711
760-6316 (Fakiska)

Administrative Office
45 Commerce Drive
Augusta, ME 04330-0073
207-623-6799
TTY fadlan adeegso Relay 711
207-287-5292 (Fakiska)